# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 42aad Fadhigii 7aad

**Isniin 24 February 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud cisman

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Xog-ogaal U Noqoshada Xaalada Dalka.

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud** **(4min 37sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shirgudoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafadaba waan salaamayaa, Run ahaantii xaalada dalku aad ayay u wanaagsantahay meelo yaryar oo wax ka jiraan mooyee sida gobolka sanaag oo kale, oo aanay dawladu qaybteedii ka ciyaarin oo hada xalay oo aan la hadlay odayaashu waxay ii sheegeen in ay sugayaan Badhasaabkii oo u balan sanyihiin in ay xeebta u dhaadhacaan oo hawshii meel soo saaraan labada dhinacba.

**Arinta xisbiyada:-** Run ahaantii si aad ah ayaanu u soo dhaweynaynaa, waayo saddexdan xisbi wey isla meeraysanayaa oo wadanka dhana uma dhaqaajinayaan, waxaan soo dhaweynayaa in ay xisbiyo fir-fircooni meesha yimaadaan waan soo dhawaynayaa.

Dhanka kale in ay xisbiyadu muran uun la soo taagnaadaan waxaa ka fiican in ay danta qaranka u tanaasulaan, taasi may ay dhicin oo maalintii dhaweyd madaxweynuhu qudbad sanadeedkii si fiican ayuu u dhigay, waanan soo dhaweynayaa in xeerkaa kaabis iyo wax-ka beddel lagu sameeyo.

Xisbiyadii jiray waxaan u arkaa in ay yihiin dad isku xaafad ah marka runta la sheego, wax isku xaafad ahina meel inama gaadhsiinayaan oo murankaa ayuunbaa sii socon doona ee waa in ay yimaadaan dad kala duwani oo la yimaada siyaasad furfuran taas ayaaloo baahanyahay.

Waxa aan maqlaayay madaxweyne farmaajo ayaa halkan imanaya, waxbaana inagaga maqan ee waa in aynu wada hadalnaa hadii ay noqon lahayd aqoonyahanka, dhalinyarada iyo cid walba waana muhiin in la wada hadlaa oo ay Somaliland waxeeda ay heshaa oo ay siyaasadeedu furfurnaataa cay iyo aflagaadana waxba lagu heli maayo.

Xukuumadu waa in ay keentaa qorshayaasheeda si loogu ansixiyo si ay u noqoto wax dadka oo dhami ku qanacsanyihiin waana mid lagu badbaadi karo, laakiin dad suuqa iska jooga oo aan xil u hayn dawlada oo hadana dadkii kala kicinaya waa laga fiicanyahay, waxaanan leeyahay maadaamo oo ay xisbiyadii hore beer-dareeyeen fursadihii soo maray waa in ay yimaadaan dad ka faa'iidaystaa aad ayaan idiin salamaya.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi** **(18min 20sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shirgudoonka, xildhibaanada, Shaqaalaha Golaha, Saxaafada iyo Martisharaftaba waan salaamayaa, Anigu waxaan taa-taabanayaa afar qodob oo koob-kooban marka ugu horaysa waxaan ka bilaabayaa:-

**Wax-barashada;** sida aad la socotaan shaqaalaha iyo ciidamada, xukuumada iyo inaga (Golaha wakiilada) ayaa isla jaan goyna mushaharkooda iyo gunnadoodaba waanad ogtihiin waxa ay qaataan, aniga oo ku amaanaya Madaxweyne Muuse Biixi sida uu hawsha badan u galiyay dugsiyada wax-barashada ee hoose/dhexe oo ay buugaagtu noqoto bilaash, dugsiyada wax-barashada ee Dawaladu. Laakiin hal meel ayay dhibaato ka taagantahay oo u baahan in aynu xukuumada la xalino hadii aynu la xalin weynana aan ahayn mid xalismaysa oo aan lagu sii dayn karrin xukuumada oo kaliya.

Arintaas oo ah arinta jaamacadaha oo marka uu ardayga uu dhalay qof shaqaale ama Ciidan ahi soo gaadho jaamacad xoolaha aynu mushahar u siinana aad gaaranaysaan, jaamacadihiina ay doonayaan dhawr boqol oo doolar semester-kiiba marka aad ka timaado hawlihiisa kale ee ay ka midka yihiin buugaagtii iyo wixii la mid ah, awood umalaha ninka xuduuda inoo taagani in uu ilmihiisa jaamacad geeyo oo cida kaliya ee laga xukumay waxay noqonaysaa shaqaalihii iyo ciidamada Qalabka sida.

Waa talo xumo dhexdeena ah mooyaane weynu u haynaa qaabkii ay jaamacado ku gali lahaayeen, tusaale yar ayaan idin siinayaa **Jaamacada Hargeisa** dhismaha dawlada ayaa leh lacag badana waa la siiyaa oo dawladaa siisa, **jaamacada Camuud** ee ku taalda Boorame dhismaha dawlada ayaa leh, **Jaamacada Nugaal** eek u taala Laas-caanood Dawlada ayaa leh dhismaheeda, **Jaamacada Sanaag** ee ku taala Ceeri-gaabo Dawlada ayaa leh dhismaheeda, **Jaamacada Burco** ee ku taala Buco Dawlada ayaa leh dhismaheeda, iyada oo aynu hada galinayno Dhawr Milyan oo Doollar hadana qaabka ay u shaqaynayaan waxa ay noqdeen qaan gaar loo leeyahay (private institution) waana jaamacadihii inaga dabooli lahaa qayb ahaan shaqaalaha iyo ciidamada.

waxa ayna qaadaan semester-kii inta ay qaadaan jaamacadaha gaarka loo leeyahay sida jamacadaha **Golis iyo Alpha** oo 10-guri ku jirta oo inta ay kiro bixinaysaa aad qiyaasi karaysaan oo 30,000 oo dollar bixnaya bishii in la mid ah ayaynu ka daboolay ama ka badan, waxanan jeclaan lahaa in aad soo eegtaan guryaha dawladu leedahay ee ay ku jiraan jaamacadahaa dawladu waxaanad qiyaastaan qiimaha ay noqon lahaayeen taas

ayanu lacag ugu darnaa oo dhawr Milyan oo dollar ayaa ku baxaya sanadkan oo kaliya, su'aasha is weydiinta lihi waxay tahay maxay inoo taraan ama inoo soo kordhiyaan?.

Waa meeshii aynu ka dabooli lahayn wax-barashada Shaqaalaha iyo ciidamada ciyaalkooda wakhtigii jaamacad ay gali lahaayeen gaadhay, arinkaasi waa danbi, danbigaa oo ay kaw ka yihiin oo aan ku canaanayo Goleheenan, waayo inaga ayay ahayd in aynu go'aamino kootada ay ka qaadanayaan jaamacadaha shaqaalaha iyo ciidamadu.

Qodobkaygaa 1aad waxaan kaga baxayaa waar aynu u gurmano shaqaalaha iyo ciidamada caruurahooda waana inagu gaf in ay jaamacad seegaan inaga oo intaas oo milyan sanadkii bixinayna, intaas oo dhisme oo aynu inagu leenahay iyagana lagu shaqaysanayo oo hadana jaamacadihii ay tukaan noqdaan waa danbi waxaanan jeclaan lahaa in aad qodobkaa igu taageertaan (10 taageero ayuu helay).

**Saami-qaybsiga;** aniga oo ka mid ah deegaana la tuhmayo in ay saami qaybsiga ka qabaan dood badan, dhawr iyo labaatan kii sane oo aan halkan ka shaqaynayay ee aan marna ka ahaa shaqaale dawladeed marna aan ka ahaa xildhibaanka doodaasi way taagnayd, laakiin anigu marka aan khibradayda eego Dadkan aanu kaladhka haysano ee aanu leenahay waxayagii ayay qaateen, waxbaa noo dheer oo waxaa noo dheer marka aad hoos u eegto (*waxa uu yidhi hasha Kudna waa dilay waxna waa u weheliyaan)* waxaa noo dheer ka qayb qaadashada siyaasada iyo xukuumada, iyo waxa dalka ka socda isku hilawga iyo qaabka loo ol-olaynayaa qudhayada hadii gar ilaahay la eego waxbaa naga dhiman oo in aanu eeda dadka wada saarno maaha.

Anaga laftayadu waa in aanu dib iskugu noqonaa qaabka aanu hada wax u wadnaa inta aanu iska seexano subaxa aanu soo toosna inta aanu makarafoonka qabsano oo aanu nidhaa waa lanna boobay maaha e waa in aanu la nimaadnaa talo oo la naga helo dadaalkii iyo sidii aanu hawshan u gali lahayn.

Waxaan qabaa wax badan baa la isku dayay in arintaa guud ee saami qayb siga wax laga taataabto, laakiin dhinaca ay ka jiiftaa maaha oo kaliya hadii aan carabka ku dhufto ee la leeyahay beesha dhexe ayuunbaa waxayagii qaadatee ee anaga laftayada talo badan ayaa naga dhiman. Taasna waxaan ka bogsiinayaa dadka u qaatay in aanu nahay dad jaqaaq leh uun oo kaladhka dadka haysata oo sii ordaya oo marna Puntland u socda marna Fadaraalka u sii cararaya hadana leh waxayagii halana siiyo, dee suuro gali maysee waa in aynu gudaha isugu nimaad oo aynu ka wada shaqaynaa sidii aynu dadka wax ula qaysan lahayn.

**Doorka Golaha;** ta laga dhawaajiyay ee ah Golahani waa in uu doorkiisa siyaasadeed qaataa, hadii aan dib ugu noqdo Doorka siyaaasadeed ee golahani waxa uu lumay markii inaga iyo dadweynuhuba aynu dhagaysanay beenta ah saddexda xisbi qaran ayaa dalka u igman in ay taladiisa ka hadlaan waana been cadaan ah oo lagu kufsaday awoodihii Dastuuriga ahaa ee Golayaashani lahaayeen waana been ay ku cel-celiyeen Xisbiyada

Mucaaridka ahi si ay kaladhka ugu qabsadadaan golayaashii qaranka ee lahaa in ay ka taliyaan arimaha Dalka.

Nin ka mid ah xisbiyada mucaaridka ah oo keenay kalmadaa Goluhu waa in uu doorkiisa ka qaataa arimaha siyaasada, dee hadii ay is waansanayaan oo ay ka noqonayaan ku qabsigii xukuumada iyo Golahayaashii loo doortay in ay wadanka ka taliyan, oo ay talada u sii daynayaan ayna odhanayaan waar bal taladii wad-wada waa arin wax laga garto oo aynu wadi karno laakiin hadii ay sidii hore tahay ee ahayd saddexda xisbi qaran ayaa arimaha oo dhan ka taliya, bal idinkaan idin waydiiyee sharciga halkay kaga taalaa arintaasi?  Waxaan leeyahay waa been lagu cel-celiyay.

Saddexda Gole (Guutida, Wakiilada iyo Xukuumada) ayaa leh in ay ka taliyaan talada dalka, hadii saaka laga bilaabo xisbiyadii inala garteen inay faraha ka qaadaan fara-farayntii ay ku hayeen talada guud ee qaranka. Iyagu waxay ahaayeen instrument loo sameeyay in ay Dimuquraadiyada ka taliyaan, hadii ay taa ku ekaanayaan waa mid aan soo dhaweynayo, waana mid wax laga garto.

**Furitaanka Ururada iyo Axsaabta;** Guud ahaan anigu waan soo dhaweynayaa, waayo mishiinka wadi lahaa arimaha Doorashooyinka ay talo ka imanlahayd waxay ahayd xisbiyada, xisbiyadii hadii ay ku guul daraysteen sabab allaale sabab ay inoogu sii fadhiyaan taladoodiina aynu aragnay *"nin ayaa waxa uu I weydiiyay oo igu yidhi waar raali ahaada waxaanu u haysanay in qaladiinan golaha wakiiladu in aad sabab u tihiin sii fadhiga aad meesha sii fadhidaane waxaanu ogaanay wareerku meesha uu ka jiraaba waa xisbiyada"* ilaaa shacabka ayaa og hada waayo laba sano ayaa la inaga dilay komishankii hore in la badallo oo laba boqol oo Page laga qoray hadana la leeyahay kuwii hore ha la soo celiyo, markaa in xisbiyadii la furaa oo xisbiyo caafimaad qabaa inoo soo baxaan anigu taas waan taageerayaa.

Laakiin mid ayaan ka digayaa dhaqanka siyaasada hadii aan la badalin Somaliland Gudeheeda wax alle wax ay soo kordhinayaan xisbiyo cusub oo la furaa jiri mayso, hadii ay noqoto siyaasadu kilaabka ay ku aruraan ninka yara wareera iyo gabadha la mid ahi oo dadka xun-xuni iskugu ururaan oo dadka hagaagsanina iman waayaan oo culimadii la waayo, oo mutacalimiintii la waayo, oo ganacsatadii la waayo oo qofka waalan ee ordayaa uun uu siyaasada ka qayb galo oo uu halkaa isasoo taago siyaasadu waxba inoo soo kordhinmayso.

Afmiishaar, digdigle iyo qof laga quustay iyo dadka ugu liita ayuunbaa hada inoo fadhiya, 80% waa dadkii aan ehelka u ahayn, markaa hadii aan dhaqanka siyaasada iyo dadkaba aan la baddelin oo aan dadka maskaxda aan loo maydhin oo aanay dad hagaagsani aanay iman waxba hagaagi maayaane waa in dhaqanka siyaasada la baddelo.

**Wada-hadalada Somaliland iyo Somaliya;** wada hadalada cid ayaynu sharci ahaan inta ay labada gole wada fadhiisteen ayay 109-cod ku ogalaadeen in ay xukuumadu wakiil

inooga ahaato wada hadalada *"wiil hadii aad sahan u dirsato hadhawna marka uu sahanka kuu soo noqdo oo uu ku yidhaa galbeed ayaan ku arkay meel nugaal leh oo aynu dagi karno oo aad la muranto oo aad tidhaa adeer maahee bari inoo rar''* markaa cida aad sahanka u dirsato waa in aad aamintaa.

Anigu waxaan qabaa sahankaa waxaynu u dirsanay madaxweynaha iyo xukuumada sharci ayaynu ku siinay ee ha laga daayo kaladhkan lawada haysto ee maalin walba la leeyahay xagaad u socotaa iyo ayaad la kulantay, waa in xukuumada aynu u daynaa oo aynu ku daba joognaa wixii ay inoo keentana wixii aynu la sixi karno aynu la saxno (4 taageero ayuu helay).

**Dekada Berbera;** Arinta dekada Berbera ka gudi ahaan maalin dhaweyd ayaanu soo marnay warbxinteedana golaha waanu siin doonaa, shaqo weyn oo halkaa ka socotay waa alle mahadii. Warbixintaa ka hor dhici maayee golahaanu keeni doonaa wa bilaahi tawlfiil.

**Md. Maxamed Faarax Qabile (11min 45sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shirgudoonka iyo Mudanayaasha waan salaamayaa, doodan bilaabantay waa xaalada dalka laba ayaan u qaybinayaa midi waa arimaha Dibada midna waa arimaha Gudaha iyo hawlaha hada socda waxna waa waxyaabo soo yiilay oo wixii munaafacaad iyo guul daro ay inoo yeesheen iyo mudadii ay jiraan daraasad lagu sameeyo oo la tirsooco ah.

**Arimaha Dekada Berbera**; waxaynu soo galnay heshiisyo leh qaab caalami ah ama goboleed oo aynu ogsoonay sidii ay golayaasha sharci dajinta kaga dhex duseen weynu ogayn, waaqaca dhabta ah ee nuxurka u ah heshiisyadaa Somaliland waxba kamay ogayn Golayaashuna rabitaan kii xukuumada ayay raaceen, waxaana mar kasta saldhig uah loona baahanyahay inay jirto daah furnaan xog dhab ahna laga hayo waxa la ansixinayo ama gacanta loo taagayo.

Wajigaa hore isaga oo mugdigaa ku jira ayuu soo socday, waanay ka soo baxayaan waxyaabo saluug leh, aniga oo iska taagaya dhinaca sharciyada gacanta oo la taagaa maaha mihiin laakiin waxaa muhiim ah in la dhawro shuruucda dalka iyo Dastuurka qaranka sida ku cad Qodobka 53aad ee Dastuurka Somaliland.

Waxaan qabaa in arintaasi madaxweynahana ku dhahoo mugdigii ay xukuumadii hore kaga tagtay wuu ku jiraa marka laga tago waxyaabo shaqaalaha iyo dhal-dhalaal ah oo lagu kabo ay jiraan, marka aad heshiis caalamiya aad ilaashanayso in aad qodob qodob isku dul taagto oo aad tidhaa kaasina wuu fulay kaasina muu filin ayaa la eegayay. Wixii lagu hagi lahaa golahan kamay bixin wax allaale wixii socdaana waxaan qabaa inay tahay wax mugdi ah

Yeelkadeedee waxaa la yidhi *"amaano kugu raagtay yadaa baad moodaa"* Arintaasi waa arin inagu raagtay oo ay xukuumada cusub ee dhalatayna aanay ka daba tagin, oo daba-gal

ayaa lagu sameeyaa heshiisyada caalamiga ah e maxaa faa'iido inoogu jira? Maxaase khasaare inoogu jira ayay ku sii waday xumaada cusubina markaa aragtidaydii in uu mugdi ku jiro waxba iskamay baddelin aragti ahaa.

Arinta DP_world ayaan dhaweyd waxaan maqlaayay markii uu madaweynuhu uu ka soo noqday ethipia isla markiiba raysal wasaarada Ethiopia waxa uu u duulay Dubai oo laga soo wada hadlay in saamiyadii inaga ethiopia, iyo Dp-worl uu korodh dhacay waana arin fiirsigeeda leh oo saami ay Dp-worl leedahay iyadaa cida ay doonto ka iibinayso maaha arin faa'iido ay ugu jirto Somaliland 15% ayaa hada loogu daray, halka ay hada Somaliland leedahay 30% halka Ethiopia looga dhigay hada 34% halka ay gacanta DP-world ay ku hadhay 36% arintaasi arin Somaliland u cuntanta maaha.

**Arimaha Dibada;** Marka aad qaadanayso siyaasada arimaha diba dabarkaa xildhibaanadu sheegeen waa dhab ee la furay wuxuu ahaa nuxurkiisu Somaliland meeshiiloo tagi karaba waa loo tagayaa meeshuu galena waa loo galayaa laakiin umaynaan furin dhul oow lagu socoye soco umaynaan furin markaa wada hadalada Somaliland iyo Somalia ee soo socday waxba lagama faa'iidin meel ay ku qotomaan iyo qodob la tix-raaco midna kuma hayno.

Maantana waxaa inagu soo biirtay siyaasada arimaha Geeska Africa ee inta badan laga dayrinayay in ay Somaliland raad togan ku yeelato, waxaanan maqlayaa afar dawladood ayaa dhex-dhexaadinta ay xukuumada Somaliland ay ogolaatay waxayna kala yihiin Turkey, Djibouti, Ethiopia iyo Sweden dawladahaa saddex ka mid ahi wixii ay Somaliland soddonkaa sanadood ay la dagaalamaysay in ay iyagu furinta hore ugu jiaan arimaha midawga.

Markaa madaxweynayaashii hore golayaasha wax ayayba waydiin jireene kan hada joogaa waxa uu ku socdaa speed-ka Light-ka oo meel liisankaa iyo badheedhka intaa leeg iyo awoodaa uu gacantiisa ku fulinayana meel lagu siiyana lama garanayo.

Waxaan leeyahay arimaha masiirga ah marka la qaadanayo saldhigoogu waa daah-furnaan iyo in xog la helo waxaanan qabaa in au arintaasi tahay mid jar-iska xoornimo ay ku jirto, waa arin cida riixaysaa ay tahay dawlado shisheeyo oo dano gaar ah leh, markaa waxaan leeyahay arintaa wixii faa'iido iyo khasaare inoogu jira halagu noqdo.

**Furashada Asxaabta;** Qaraar kasta oo aad gaadhaysaa waa in uu ku fadhiyo waaqica jira, xildhibaano ayaa iisheegay waxaa la qabanaya doorasho aan deegaanka lagu kala saarayne xisbiyada lagu kala saarayo ma iyadaa nuxurba yeelanaysa, markaa intaa la galin kaabista iyo wax-ka-baddelka iyo arinka lagu deg-degayo hadii aynu si caadifah ah u raac kubada ay xukuumadu ina hor dhigayso waa in la eegaa umada masiir-keeda maxaa faa'iido ugu jirta waa in la eegaa, waxanan qabaa in uu yahay arin laablakac ah oo laga jabayo kubka iyo bawdada oo jaha wareerkii jiray sii siyaadinaya.

Madaxweynaha iyo xukuumada waxaan u soo jeedinayaa hirdanka dhexdiina ah waxaa fiican in laga fuudhyeelo masiirka umada ee waaraya.

Waxaan leeahay groubka Facbookers ah ee social mediaha booba inaga talaabin maayaan wabiga aan arkaayo ee waxay u baahantahay in cagta loo dhigo oo la lafo guro.

Hadalkayga waxaan ku soo koobayaa laba dagaal ayaa ina horyaala oo midi yahay mid masiiri ah oo dibada inaga socoda oo Somaliland oo dhan ku socda, midana waa mid aynu inagu isku wadno oo gudeheena ka socda xukuumaduna ay horseed ka tahay xibiyada iyo qaranka oo dhan cid ayaa loo igmaday oo madax u ah, cidaa oo loo bahanyahay in ay qodaxda ka gurto, waxaana loo baahan yahay in arinkaa dagaalka diba ay Somaliland u midawdo ayaan soo dhaweynayaa waxaan leeyahay xisbiyada aynu ku kala jirno aynu ka soo baxno oo ay u midawno danta qaran waad mahadsantihiin.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne)** **(11min 45sec):-** Bismilaahi, dooda aynu maanta u fadhino waxay ila tahay waa mid aad u muhiima, waa dood aynu doonaynu inaynu inagu wax is-tusaaleyno ra'yigaynu qabno aynu tusno, horta marka hore dagaalka ceelafweyn ka socday ee Somaliland shiikheedii, shariifkeedii iyo siyaasigeedii iyo Madax-dhaqameedkeedii isugu tageen Illaahay waxaan ka baryaynaa inuu ku soo dhamaado is-afgarad, wanaag iyo dagaalkaas oo joogsada, waligeena waynu isu gurman jirnay oo maaha wax cusub inkasto baaxada gurmadu uu ka wayn yahay kii hore ee Beelaha dagaalama ama is-qabta loogu gurman jiray, rajawayna waynu ka qabnaa waanu soo dhamaanayaa insha'alah. Taasi waa tan gudaheen.

Tan labaad, Dagaalka Tukaraq ka soconaya oo ah waxyaabaha taagan, dagaalkan tukaraq waa mid wadaninimo iyo dawlinimo ah inaguna horta marka hore maynu duulin, ilaa maalintii Somaliland la dhisayna ha noqoto shuruucdeena ama ha noqoto hadalada aynu ku hadlayne waxay ahayd in xadka la gaadho oo dalka xadkiisa la helo, marka dawlad la ictiraafayona waxa weeye inay leeyihiin xad la yaqaano, waynu leenahay xad la yaqaane waynaan gaadhin, inaguna mabaa'dii baynu ku soconaynaa, qolada aynu is-hayno ee Somaliyana waxaa wax ka duwan oo sare oo somaliya aan jirin waxbana aynaan u hayn iyo iyagoo doonaya wax la yidhaahdo (poverty zone) dhul inoo dhexeeya iyaga iyo inaga oo banaan inay ka dhigtaan arrinta ay wadaana waa sidaas.

Dunida waxa jira wax la yidhaahdo patriotism oo ah wax Wadaniyada ka sii saraysa, qofka wadanka u dhinta ama u gala waaxyaabahaas oo kale ayaa la siiyaa bilad patriotism ah, waxaad moodaa inay inaga maqantahay wadaniyadii gabigeediiba, sababtoo ah ilaa maalintii aynu dhulka joognay inagu waxaynu lahayn nabad baan doonaynaa, nimanka inaga soo horjeedaana mar walba dagaal iyo xabad bay doonayaan haday gudaha tahay markay garoowe joogaan iyo hadii kale oo xalay waxaad dhagaysanayseen biljimka wuxuu ka lahaa oo dagaal kaga soo hanjamayay, anigu waxay ila tahay maleeshiyadaa dacaska sidata ee uu meesha ku soo ururiyay in aanay

Ciidankeenka wax yeeli Karin, laakiin hadaynu shacabkii nahay qaybtii aynu ku lahayn ayaa meesha ka maqan.

Iyagu hub urursi iyo ciidan urursi bay ku jiraan intaas, waxaa la ii sheegay in garoowe dumarkii ay meel ay joogaan ka soo urureen ay kimista samaynayaan oo biyaha lagarab joogaan iyagoo dahabkoodii iyo nafhur samaynaya, inagu halkanaynu liinta ku cabaynaa, wadanku waa inuu gala xaalad dagaal waayo iminka haduu halkaa ka bilaabmay joogsan maayo, baritone Farmaja inta u hadhay soo qaadaya, waad ogaydeeno maamul Goboladooda oo dhan baa intay shireen ayay ku puntland ku raaceen in Somaliland la cunaqabateeyo oo dagaal lagu qaado, markaa waxaan soo jeedinayaa waa inaynu samaynaa tacbiya Caama xaalad dagaal oo waliba Xukuumadana kula talino.

Xaga siyaasada, dee Siyaasada inagu qaybaynu ka nahay Madaxweynaha hogaamiya wixii faa'iido ama khasaare ka yimaadana isaga ka masuul ah iyo wasiiradiisa waayo isaga haga siyaasada arrimaha gudaha iyo dibada, wuxuu ku dhaqaaqona waa inaynu taageernaa sax iyo khalad waayo isaga masuuliyadii qaadayee, haduu garoowe cid u dirayo iyo haduu u dirayo Xamar iyo haduu u dirayo Djabuti, waxay ila tahay dadka siyaasada looma wada sheego, waana laba siyaasadu mid gudaha ah iyo dibada ah. Hadalka uu ku hadlo Baarlamaanka Somaliland waa wax caalamka oo dhan laga dhagaysanayo markaa hadalka aynu ku hadlaynaa waa inaynu wax badan ka dhowrnaa.

Siyaasada Arrimaha Dibada, arrimaha dibada saluug badan baa ka jira waa run oo ka muuqata, laakiin DP World anagu waan tagnay dee ma jirto waxan Xildhibaanadu sheegayaan, laakiin waxa weeye Berbera horena waan uga hadalnay hadaanu Gudidda Dhaqaalaha, Gudidda Joogtada ahina way ka hadashay, waxaan leeyahay 60 kun baa ka codeeyay Gobolka Saaxil, boqol baana xidhay Gobolkii, Berbera waa magaalada qudha ee gawaadhida lagu fuudhiyo joomitirku intuu gaadhi kaxaysto uu taabto mitirkiisa, meel kale kama dhacdo, anaga iyo Gudida Joogtaduba waanu ka hadalnay, waa in wax laga qabto arrimahaas oo kale.

Maanta Dhaqaaleheenu wuu hooseeyaa, barigii Ingriisku joogay Degmada dhaqaalaha yar leh kan kale ayuu wax uga soo qaadi jiray, maanta Gudoomiye adhiga iyo Xooluhu aaga Tog-dheer bay ka yimaadaan iyo Sool, Sanaag, Badhan, Oodwayne, Saraar iyo Buuhoodle, shantaas Gobol Xoolaha ka yimaada Burca lagu kala iibsadaa, cashuurtoodana Berbera lagu kala qaadaaaa, ma cadaalad baa taasi, iyadoo wixii ka soo dega dekana halka lagu cashuuro, waxaan leeyahay cadaalad daraa jirta wadanka dhexdiisa, markaa Xeerka Lr. 12 dib ha loogu noqdo ayaan soo jeedinayaa.

**Mudane Gudoomiye, Anigoo soo gaba-gabayna, nuxurka hadalkaygu waa laba xaalo:-**

- In la inaga helo Wadaniyadii oo aynu u diyaargarowno dagaalkaas hubkii iyo ragii oo uu noqdo dagaal kuwajahan umadeenii,
- tan labaad, siyaasada inaynu u dayno cidaynu u dooranay,

- saddex, dhaqaalaha wadanka sidii la isugu dheelirirlahaa bari iyo galbeedba waa in hadaynu nahay baarlamaankii umada aynu ka shaqaynaa,
- waxaan ku darayaa Gudoomiye dad baa dibada inaga caaya oo mar walba yidhaahda Baarlamaanku waa xaaraan, mar yidhaahdaa waa laaluush quutayaal oo wax walba inagula hadla, Dastuurka Qodobkii 22aad farqada 5aad waxay sheegaysaa in qofka sharaftiisa iyo magaciisa aan meel laga dhici Karin, waxaan arkayay kuwo aan halkan ku ansixinay oo ina baryay bari dhowayd oo habeen dhowayd laha waa xaaraan, markaa waxaan leeyahay waa in la anshaxmariya oo talaabo laga qaadaa oo la-taliyayaasheenu soo eegan.

**Md. Cabdiqaadir X. Ismaaciil Jirde** **(12min 58sec):-** Bismilaahi Raxman Raxiim, arrintaas DP World waxba inagagamay baaqan baan u malaynayaa doodeheenii hore wixii aynu ka digaynay uun baana soo baxayo waa taas laga dayrinayo in aan wax dhamaystiran oo xiliyaysan oo daraasad leh aan la inoo keenin, siduu inoo dhaafayna waxba ku noqon mayno, waxaa la yidhi cidii Baarlamaanka wax sheega waa la xidhayaa oo nala xidhaan ka baqanayaa, taas dib u noqon maayo, tii saldhigana waxba kaga noqon mayoo waayo wixii laga digayay ee aanu ka hadlaynay ee la moodayay inaanu cid eryaynayno oo dawlad eryanayno baa taagan markhaatiga ha nagala masuugina, taas waan la qabaa ragii ka hadlay aniga laakiin hadal igu baaqday muu jirin oo waaba la igu karaahiyaystay.

Siciid baa ka dhawaajiyay arrin mudoba soo socotay oo la hadal hayay taas oo ahayd turxaantii ka dhalatay doorashooyinka, doorashooyinku markay yimaadaan xanaafiir bay ka tagaan, sidii aynu gudoomiyeheena ku dooranayay halkay inala martay waad ogaydeen inagoo 82 nin ah siday inoo kala qaybisay waad ogaydeen, tan qarankoo dhan ka dhacdaana ka sii daran oo way ka dhib badan tahay, khasaara ka dhashay, dhimasha iyo dhaawac baa yimi, xadhig baa yimi waajibku wuxuu markaa in talaabo ugu horeysa qolaa tidhi C/raxman baa diiday oo dubia u raaci waayay oo Madaxweynuhu turxaanta wuu bogsiin lahaa haduu c/raxman u raaco Dubia, turxaantu intaas kuma ekaa kumana dhamaato, talaabadii u horaysay anagaa qaadnay iyadoo waajibku ahaa xukuumadu soo qaado, waad ogaydno Alle ha u naxariiste aaskii la isugu yimi Axmed Yasiin Gabixadi aniga intaan Madaxweynaha gacanta qabtay oo u geeyay musharaxii uu codka ka helay, anagaa abuurnay anagaa la nimi oo na looma yeedhinaaa, anagaa intaanu islawaynidayadii iyo candhuuftayadii dib u liqnay u kacnay oo u tagnay, may midho dhalin oo laguma guulaysan xagay ahayd ee waajibkana lahayd waa la garanayaa, markaa taas waxaan u sheegayaa qoladii lahayd C/raxman haduu u raaco way iska dhamaan lahayd.

Asxaabta Qaranku baakoorad la qaato oo lagu xaragoodo maaha, wax sawir lalagalo maaha, hadii wax la waydiinayo si milgo leh oo sharafi ku jirto in loo waydiyo weeye, taas caleemo saarkana wax inoogu horeeyay maaha oo tii Madaxweyne Rayaaleba

Madaxweynihii uu ka helay uma tagin kamuuna qaybgalin, khasabna maahee waxay ku xidhan tahay kolba cilaaqaadkiina iyo sida milgaha iyo ixtriaamka loogu sameeyay ku xidhan tahay, taasi waa sidaas oo waxba ku dheeraan maayo.

Anagu niyad Wanaag baanu muujinay, waa tii Madaxweynuhu isugu yeedhay Madaxda Qaranka iyo Asxaata oo Madaxweynihii hore, M/weyne ku-xigeenadii hore, Gudoomiyayaashii iiyo Gudomiye ku-xigeenadii hore, Cali khaliif iyo dadkii talo la bidayay oo wax la iska waydiinayay xaalada wadanka oo taas aynu iminka iswaydiinayno ayaa la iswaydiinayay, waxaa nooga wada markhaati ragii meesha joogay oo noo qiray markaanu nidhi wax alaale iyo wixii aad diyaar u tahay adigu ilayn initiative-ka adiga lehe oo la isma baalyaace, arrinta tukaraq la isma baalyaacayo, taas Ceel-afweyn la isma baalyaaco taladii adiga maanta haya maxaanu kula qabana, balan waxaanu kaaga qaadayna anago xisbi mucaarad ah inaanan kula xantaysan oo tukaraq xaq baanu u lahayn in information-ka nala siiyo oo la yidhaahdo sidaasay wax u dhaceen muraadkayaguna sidaasuu ahaa, suuqaan warka ka qaadanaa anagoo ah Gudiddii Nabadgalyada iyo Difaaca ah makhaayadaha ayaanu warka ka helnaa.

Dawladii Siyaad Barre ayaa nin Wasiiro iminka halkan jooga Magaciisa sheegi maaye ayaa markii ay dagaaladii u kululaa halkan ka socdeen ayaa yidhi Madaxweyne miyaana waajib ahayn inaad iisoo waranta dareewalkaygaan warka ka qaataaye buu yidhi Saleebaan Maxamuud Aadan buu ahaa, dareewalkaygan warka ka qaata oo Golaha Wasiirada la igama waramo, anagoo Xisbigii labaad oo dalka ah oo 42% helnay oo Madaxdii dalka ka mid ahayn, anigoo Gudiddii Nabadgalyada iyo Difaaca ka mid ah tukaraq warkeeda maqaaxida Cali mataan ee fadhi ku dirirku isugu yimaado ayaan ka qaataa, Shir-gudoonku nooma waramo hadii si gaar ah la idinku soo waramo, hadii xildhibaanada qaar si gaar ah loogu waramo oo ay naga war roonyihiina nooma waramaan, horta arrintu waa taas oo milgo iyo ixtiraam baa la isku leeyahay, nimankayagii sidaad u dhaqmay ee yidhi waanu kula shaqayn oo wax alaale waxaad u baahan tahaan kula qabanayanaa waad mahadsan tihiin iyo telefoon naga daba yimaada midna ma hayno. Marka waxaan leeyahay hadii la leeyahay cid baa diiday turxaan saarkiyo dubia u raaciwayday xaqiiqadu waa taas, waliba sidaasaanu anagu diyaar nahay inuu Madaxweynayahagii yahay inuu wixii dhibaato dalka ku yimaada kala shaqayno oo kala qayb-qaadano, war baan jirin wax kale daayo.

Arrimaha Dibda, anigu arrimaha gudaha waxba ku dheeraan maayo oo laga waramay, arrimihii dibaba sidii loo sheegay wada-hadalada dawladaa inoola yimi waliba dawlado aynu isku halaynay oo David Cameroon ba soo bilabay oo shirkii London lagu qabtay ee madaxweynayasha badan la isugu keenay ka dhalatay, dawladuhuna waad aragto markay halahaas galaan they expended political capital sumcadoodii iyo miisaankay aduunka ku lahayeen bay badka soo dhigayaan oo aduunka tusayaan wayna khamaaraan oo ma doonayaan inay hoos uga dhacaan oo fashilmaan.

Waynu aqbalnay iyadoo aan talo badan laga gaadhin oo heer qaran loo tashan waliba dadka masaakiinta ah ee aan xog-ogaalka ahayn waxaa loo sheegayay inaynu mucaawinooyin badan ku helayno oo wax inoo kordhaya oo waxeena gaar ba la inoo siinayaa, degradation baa ku dhacay ilaa maalintii London lagu qabtay way soo socotay Turkigaa la isugu tagay, qadar baa la yimi, marka dambe Qadar iyo Masar iyo Suudaan in la tagi doona u malaynaa oo graphku wuu soo degayaa oo Dawladihii aduunka ku cuslaa ee la ixtiraamayay hadalkooda way ka soo gudubtay yamyam iyo qadaadweyn ayaa qaadatay.

Marka halka hore joogtay hogaanka inaga haynay oo la ina baryayay oo dawlada somaliya ina baryaysay shuruudana dhigayay oo yidhi dad gobolkan u dhashaay oo masuuliyiin halka ka ahi ma iman karaan oo la inagu ixtiraamayay, maanta hogaankii wuu wareegay oo Koonfur buu wareegaye taas ogaada horta shirka Brussels la fadhiyo qodob baa ku jira ah oo dawlada iyo farmaajo ku adkaysanayso oo intercalation community-gii siday ugu gor-gortamayaan oo si gaar ah inaga inoogu saabsan dawlad goboleedada iska daaye, waxayna ugu qoran tahay in Somaliland waxa la siinayo isaga la soo mariyo, halkaasu maanta gaadhay ninkaynu hogaanka u haynay ee ina baryaynay maanta halkaasu marayaa, inaga xageenay ka timi waliba aynu qirano hadaynaan qiran waaxba ma sixi karno yaynaan dadka been u sheegin, yaynaan dadka maaweelin.

Waxaa taas wehelisa oo sii xoojinaysa markii hore laba qaran oo si siman u wada-hadlaya ayaynu ahayn inaga la ina hor bartay oo xogteena iyo tamarteena dawladaha aduunku ogaayeen, maanta foces-kii wuu inaga wareegay dawlado yamyam iyo qadaadweynaa soo gashay dib u heshiisiinta umada somaaliyeed saddex carqaladood ayaa horyaala ayay u arkaan ilaa kuwaa la xaliyo aanay waxba soconayayn, b) waa Al-shabaab iyo Dagaalka lagula jiro, t) midna waa khilaafkii Dawlad Goboleedyada iyo J) waa Somaliland oo mushkilad hortaala oo laga horqaado ayaynu noqonay oo mushkilad inaga Al-shabaab si baa la inoo wada arkaa inaynu ku nahay Mushkilad Somaliya oo waa laga horqaadayaa, inana waxaynu u haysanaa in caalamku sidii laba dawladood oo siman siidhiga la inoogu hayso, sababtuna waxa weeye waa laga jeestay, dawlad ahaan baa looga jooga jeestay iyo qaran ahaana oo maanta Al-shabaab inay mushkilada kowaad tahay, inagu waxaynu nahay mushkiladii labaad, tii dawlad goboleedada waa la xaliyay.

Dawladuhuna markay arrimahaas galaan, Liibiya ka soo qaad Dawlada Ingriiska iyo Faransiiska ku orday oo political capital badan bay ku lumiyeen sharaf iyo sumcad bay ku lumiyeen, arrintaas Somaliland maanta in badan oo dawladahaas waaweyn ee caalamka ah oo arrinta soo ururiyay waxay aaminsan yihiin mushkilada kowaad tahay, tan kalena ay Somaliland tahay, inaguna waxaynu u haysanaa inay xal inoo raadinayaan, waxaan leeyahay soo ceshada sumcadii iyo makaanadii aad ku lahaydeen caalamka iyo dawladahaas, hadaan la soo ceshana Al-shabaab idinka ka soo horaynoo mushkilada kowaad baynu noqonaynaa.

Mandaqada waxaa ka socda maanta isbadal, Itoobiya nidaam cusub oo xawli ku socda oo aad moodo in xawligaas aanu ahayn mid ku dhisan daraasaad iyo macluumaad iyo dabagal ee impulsive ah, itoobiya waxaynu u haysanay inaynu saaxiibkeeda kowaad nahay, Djabuti xurguf baa ka dhaxaysay, Eretria way kala tageen, Suudaan iyo somaliya cilaaqaadku marna way kala tagaan marna way isu yimaadaan, waxaynuna haysanay inagu inaynu nahay saaxiibkooda kowaad ee ay isku halayn karaan duruufo jira awgood, nidaamkan cusub ee yimi nidaamkii wuu ka leexday meelo badan ayuu heshiisyo masaaliix dhaadheer ka samaystay oo 50 sano ee soo socda ayuu ku xisabtamay inagu halkeenii baynu taaaganahay oo aynu leenahay Itoobiya waa saaxiibkena kowaad, dee u noqon mayno saaxiib kowaad haduu danihiisa oo garantiina meelkale ka helo dadkana inagama jecla.

Waliba Taariikh badan oo wangaasanayn baynu wadaagnaa, Meles Zanawi wuxuu isku dayay inuu aaso taariikhdaas oo aanay soo muuqan, ifafaaleheedii maanta in dib loo soo noolayn doonay u muuqataa, hadalada laga sheegayo 120 milyan bad la'aanmaayaan nimana geeleedu bada ka cabimaayo aan wax kale ku qabin meesha, war isbadalkaasa meesha ka socda, waxaynu awoodi kariwaynay inaynu dacalka qabsano oo la socona oo khuuradooda ogaano, yaynaan inagu isu muuqan oo afka iskaga boodin isbadalkaas baa mandaqada ka socdee, colaadii Eretria kala gaadhay ee boqolka qof ku dhinteen ee personalized noqotay oo Ra'isal Wasaaraha iyo Madaxweynaha labadaas dal personal enemies noqdeen, maantana waa taas Calankii safaarada Eretria laga taagay Adisababa, inaguna aynaan war ka hayn, saamiga Berbera ay ka heleena inaga abaal inooguma hayaan oo DP World bay ugu hayaan oo intay inaga talaabsanay iyaga 19% siisay, wax alaale iyo waxaynu dhaafsiisanayna ma jiraan.

Waan ayidayaa hadalkii Xuseen lahaa ee ahaa nimankaas aynu Dekadii iyo Saldhigii isugu darnay yaanay wax kale ina sine amaah ma ina siinayaan, dekadeeniina cid kale u geeyay waxay qabanayaan iyo wado ay dhisayaana inooma muuqatee war sicir bararkan laba iyo saddex milyan oo dayn ah ma ka helaynaa, Itoobiya ayay siiyeen oo waliba iyagu la doontee, inagu maxaynu nahay maynaan dad ahayn, soo taynu ilbaxa ahayn oo Itoobiya oo aan ilbax ahayn baynu ahayne iyo Hindiya la shaqaysanaynaye, maxaa inagu dhacay oo bustaha ina saaray, Dawlad uma jeedno anagu oo diyaar baanu u nahay waana naga lilaahi, xaaladii halkaasay maraysaa, nin xildhibaana lahaa iminka dawlada uga dambeeya siyaasada, oo maxaynu nahay inagu markaa? Waad saxaysaa dawlad oo waad la xisaabtamaysaa dawlada.

Mida kale Qabile ayaa ka hadlay eeduu Baarlamaanku ku leeyahay arrimahan oo DP World inaga fududaynay, Saldhiga inaga fududaynay, halkii inaynu kaga hadhno may ahayne waxay ahayd inaynu ka daba tagno oo nidhaahno sharaftayadii baanu u liqnay xukuumada aawadeed, inaga badka Is dhignay, war waxaanu dadka tusno oo dadka ugu

abaal sheegano meesha ka keena ilayn waa la ina canaanayaaye, intiina waa taas Cumar Sanweyne yaynaan dawlada ku faragalin.

Tukaraq, waan maqlayay ilaa shalay oo la lahaa wadaniyadii iyo ninka tukaraq ka hadlaa waa sidii nin cadaan la soo saftay oo kale wadaniyadii, Dawladu tukaraq meel Wanaagsan bay dhigtay oo waxaynu caalamka u sheegnay in aynaan dagaal doonayn waxaynu iclaaminay in aynaan garoowe u socon waynuna hakinay xuduudkeenii inaynu tagno, kuma andocoonin oo nabad baanu doonaynaa baanu nidhi, hadalkaas maanta Baarlamaanka ka baxaya ee la leeyahay tacbiya caama ha la sameeyo iyo mobilization hadalkii dawladu iibinaysay dhabar jab buu ku noqonayaa waana inaynu ka fiirsanaa waxaas oo kale, bal dawlada ha lala shaqeeyo oo talada ha loo daayo iyo mobilization ha la sameeyo dee is-qabanmeyso, talo wanaagsan buu Madaxweynuhu gaadhay inkasto ayaamihii hore hadal ka dhadhaacay oo hadaladaasi wax inagu keeneen oo dagaalkii mid qabiil loo dhigay, hadana waxa waajibkeenu yahay dawladu waxay qaaday nidaam ah aynu nabad raadino oo inagu kuwa nabada doonaya aynu noqono, waanuna ku taageersanahay hadaanu mucaaradkii nahay dawlada inay nabadaas raadino kumana canaanayno, diyaarna waanu u nahay, laakiin dee waa in dawlada la xisaabiyo.

Waxa kale oo aan dadku xaq buu u leeyahay Baarlamaanka rido, dadka inagu ma lihin inaga u tagnay oo nidhi na doorta inay ina ridaan, inay wax inaga sheegaan, inay magaan xaq bay u leeyihiin, inaguna xaq uguma lihin inaynu nidhaahno cidii wax inaga sheegta inaynu nidhaahno ha la xidho, ninkii doonaya inaan wax laga sheeginow gurigiina joog, inaga kaliya maahee waa phenomena caalamkoo dhan, waxaynu u haysanaa kabcada dimuqraadiyadu inay ingiriiska tahay, halkan waxaan ku hayaa joornalka daily mail oo markii Teresa may ay ISIS ku duqaysay Suuriya baa Baarlamaanku yidhi inay wax inaga waydiisay ahayd joornaalka qaybta public opinion-ka, wuxuuna leeyahay war nimanka halka fadhiya siyaasada dawlada iyo sirteeda yaan loo sheegin go'aamada waawayn ee qaranka ha laga ilaaliyo, inaguna maantaynu leenahay ninkii wax inaga sheega aynu xidhno, dee isma qabato.

Waxaan ku soo koobayaa anagu dawlada arrinta tukaraq waanu ku raacsanahay nabadaa ay raadinayso, yaynaan dabin galinin, C/wali Gaas wuxuu yidhaahdaa inyar Bariga iyo Galbeedka Hargaysa ah baa dagaalka wada, inaguna iyaga waynu ka boodnaa oo waxaynu nidhaahnaa Farmaja Dagaalkan wada waxaynu ishaynaa waa Puntland, Ciidanka dagaalamayaa waa Puntland, waxaynu caalamka u sheegayno iyo waxaynu dadkeena u sheegayno aynu kala garano, C/wali isaga ha is hayaan ama yaynaan ishayn isaguna wuxuu yidhaahdaa waxaanu ishaynaa Jeegaanta, dhamaanteenba waynu ishaynaa.WSC.

**Md. Xasan Muuse Hufane** **(5min 22sec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo Marti-sharafta waxaan ku salamayaa Salaanta Islaamka ASC, waxaan ku bilaabayaa runtii xaalada laga hadlayo ee dalku waxaan odhan karnaa xaalada dalku waxay

maraysaa meeshii ugu hoosaysay intii Somaliland jirtay, waxaan ka bilaabayaa anigu xaalada Golaha Wakiilada, Goluhu door intee le'eg buu ku leeyahay xaalada dalka ee lagu jiro dawladu waxay ka kooban tahay saddex waaxood, goluhuna waa waax ka mid ah oo ah tii dadka wakiilka ka ahayd, doorkii uu kaga wakiilka ahaa dadka wuu ka baxa Goluhu oo ma hayo hawshiisii oo way dayaceen waxaana la qabaa Xildhibaan Qabile inuu doorkiisii dayacay golahani.

Tan labaad dagaalada bariga ka socda waa laba dagaal, mid waxa weeye mid xuduuda lagu gaadhayo waana ku taageeraynaa Ciidamada dalka inaynu xuduuda gaadhno, dagaalka labaad waa kan Ceel-afwayn ka socda ee ergooyinkii u fadhiyaan waana u ducaynaynaa oo ducaynu raacinaynaa.

Waxa dalka jira cashuur maalin walba dekda berbera la kordhiyo, wixii cashuur la kordhinayo waxaa iska leh oo ogolaanaya Golahan, waxaan ognahay macaamiishu noo sheegeen in dhowrkii bilood ee u dambeeyay maalin walba cashuurta la kordhiyo inaguna ma ogin, cid wasaarada maaliyada u fasaxdayna ma garanayno, waxayd ahayd in Gudidda Dhaqaaluhu inay ka keenaan cashuuraha la kordhinayo warbixin.

Arrinta Dekada Berbera, waxaan qabaa anigu dekada berbera xaqul qalin baa la siistay mana haboona siday wax u socdaan maanta sanad iyo saddex bilood baa ka soo wareegtay markii lagu wareejiyay waxay ka qabatayna ma jiraan, waxaan Golaha u soo jeedinayaa inay xukuumada kula xisaabtanto arrintaas.

Gobolka Awdal waxaa ka dhacay duufaano waawayn oo dadkii, duunyadii iyo dhamaan beerihii way baabe'een wax ay xukuumadu ka gaysatay oo wayna ma jirto dhowr jeer bay diyaar dhowr tan qaadaysay gaysay, dadkaasi aad bay u baabe'een wadooyin maanta ma haystaan beerihii way ka baabe'een, xoolihiina way ka dhamaadeen, dadkaas xaalada culus ku jira inay xukuumadu u gurmato iyadaa ka masuule baan kula taliinayaa.

Dalkii maanta waxa aafeeyay waa Musuqmaasuq, maalintii xukuumada kulmiye 2010kii la wareegtay ayaa Hanti-dhowr shaqeeya ugu dambeysay, hantidii umada waa la xalaashaday, dalkii meel xun buu marayaa oo cid alle cid ka hadlaysaa ma jirto, cidii la xisaabtami lahayd waa Golahan, Golahani waa inuu u yeedhaa hay'addaha ku shaqada leh.

Dhinaca doorashooyinka, Xeer baa la keenay maalin dhowayd, waanu ka hadalnay anagu Gobolka Awdal Xildhibaanadiisu waxaanuna ka hadalnay saami, saamigu waa wax mudo badan soo jiitamayay, waxaynu ognahy Maxkamadu inay 2005tii soo jeedisay in lagu doorashadaas oo kaliya ka dibna la saxo saami-qaybsigii, Gobolka Awdalna wuu ka cabanayaa saami-qaybsigaas, Madaxweynuhu shalay wuu noo soo jawaabay war-saxaafadeed buu soo saaray wuxuu yidhi Golaha ayaa ku shaqo leh saamigaas oo halkan ayuu isu soo dhaafiyay, Madaxweynaheynu ka sugaynay inuu saamiga soo qaybiyo oo

wax qaybsan Golaha isu soo dhaafiyo, kamaynu sugayn Golaha ayaa qaybinya, dee Goluhu haduu qaybinayo 17 sano ayuu fadhiyay oo uu qaybin lahaa, taasina mid anaga na qabata maaha, waxaan Madaxweynaha iyo Golahaba u sheegayaa in Gobolka Awdal aanu doorasho ku gali doonin 13 xubnood, wanuna isku raacsanahay, macquulna maaha, arrintaasna in laga foojignaado oo Golaha iyo Shir-gudoonkiisu ka feejignaadaan baa soo jeedinayaa.

Dalka sixir barar baa daashaday, sixir bararkaas oo mudo socday, lacagtii way qiimo beeshay, bangiga dhexe ayaana ka masuula qiimaha lacagta, muxuuse dejin karaa lacag badan buu suuqa gashay taaso u baahan in lagu soo cesho bangiga oo loo helo lacag adag, arrintaasi waxay saran tahay Madaxweynaha. WSC.

**Kal-fadhigii 42aad fadhigii 8aad**

**Salaasada 25 February 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Xog-ogaal U Noqoshada Xaalada Dalka Maalintii 2aad

**Md. Maxamuud Cabdi Jaamac Cilmi(Dable)** **(20m, 10sec):-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha waan idin salaamayaa ASC, xaalada aynu ku jirno ee ah qiimeynta waxa ugu horeysa horta in Ilaahay loo mahadnaqo, Amnigeenu wuu wanaagsan yahay, dadkii gacanta ka geystay iyo dadkii ka shaqeeyay ee ciidamada nabadgalyada, ciidamada difaaca, shacab iyo culimada gidi waa laga wada qayb-qaatay, waana mid ilaahay looga mahadnaqo in markasta oo hawli inagu timaado laga wada qayb-qaato oo la xaliyo nabadeenana aynu ilaashano, inkasto door siyaasadeed meesha ka maqan yahay, laakiin dadkii lahaa baa tashaday wayna ku amaanan yihiin, shacabkuna isaguun baa leh nabadgalyada, ninka siyaasiga ahi dantiisuun buu eegtaaye nabadgalyo ma eego oo waa sida ganacsadaha oo haduu fursad helo tiisaa la wanaagsan hadii kale oo uu dan u arki wayo xaga kale ayuu ugu rogayaa, marka shacabka waxaan leeyahay idinkaa leh Nabadgalyada iyo deganaanta cid aad ku haleysaana ma jirto ee ilaashada.

Booliiska iyo Ciidamadu doorkooda wanaagsan bay uga shaqeeyeen, waliba booliisku aad buu iminka u hagaagay mustawihiisii, akhalaaqdiisi iyo amar kala qaadashadiisii aad buu u wangaasan yahay, waana ku amaanayaa.

Wadankani waa wadan aynu sidii aynu kuwada tashanay aynu ku heshiinay ee aynu ku soo celinay, go'aankuna go'aan umadeed buu ahaa waana arrin in la wada ilaaliyo ah, halka, waxaan uga jeedaa, Madaxweyne Axmed Siilaanyo nin wanaagsan buu ahaa oo doorashadii iyo mudadii uu hayay nin samaha iyo wanaaga ka taliya ayuu ahaa, wuxuu ahaa ninka 50 cod laga helay ee tanaasulay ee yidhi maslaxada Somaliland baan uga tanaasulayaa, taariikhudna way u haysaa, Madaxweyne Ina Rayaale wixii lagu sameeyay waynu ognahay, si wanaagsan buu wadanka u waday, qabyaalad iyo kala beele iyo tiisa u roonaw midna muu lahayn, inaga u geysanay waxaas oo dhibaato oo inaga iska raacnay, si wanaagsan oo sharaf ah ayuu ilaa xuduudka ku gaadhay oo ciidamada ku hagaajiyay oo doorashooyinkii ku gaadhsiiyay, taariikh iyo sharaf buu mudan yahay. iminkana waxaan odhan lahaa waatas Xisbiyadii la furaye waa adigii arrintiina cudurdaarte, soo noqo oo halkii odaynimadii sii wad oo xisbigagii uga ahaw oday waayeela oo halkii aad talada ka haysay ka hay, maantana rag waaweyn baynu u baahanaye rag kuraasta isku laaya uma baahnin.

Cali Khaliif waa nin akhyaar, inta uu joogay wadanka wanaag mooye xumaan waligii kama talin, waana raga loo bahan yahay marka xisbiyada la furayo oo mid ha furto ama oday ha ka noqdo waa raga wadanku u baahanyahe. Inagoo halkan Golaha fadhina ayaa Gudidda Arrimaha Guduhu soo jeedisay war furista ururada 5 sanadood dadka way ku dhiban tahaye aynu ka dhigno 10 sanadood si dadka waynu wakhti u siino, waana qodob dastuuri ah oo saddexde gole ay curin karaan, arrintaas ay xisbiyadii ka qaylinayaan ee xeerka ururada iyo xisbiyadu intaynu ansixinay guurtiduna ansixisay ayuu madaxweynuhu saxeexay, halka Cabdiraxman Cira fadhiyay oo markaynu u codaynay isna sidaas ku saxeexay, hadaba, sidaa aynu inagu u lahayn ayay u leeyihiin saddexda gole ee dawladu ka samaysan tahay inay soo jeediyaan mashruuc sharci oo xaq bay u leeyihiin, Madaxweynuhu wax kale muu samayne tii aynu samaynay ayuu isna soo jeediyay.

Waagii Yurub Islam phobia la qaaday oo hadii nin cimaamad leh ama gadh leh train soo galo ama hudheel waa looga carari jiray, marka waxan leeyahay waxani phobia maahe waa maslaxadii umada, sidii aynu inaguba u garanay ayaa iminka la arkay inaynu u baahanahay in wexeenii dib isugu cesheno oo dhiig cusub oo cid wadanka karti iyo hufnaan u leh fursada siino ee ayna ina hortaagnaan xisbiyadani, wax badan bay xisbiyadu ina duri jireen Baarlamaanka, hada sharciga iyo waxay ku shaqeeyaan inaga u sameyn jirnay, waa sidii reer banii Israel ay lahaayeen aayada na cajabisana waanu qaadan tan kalena waxba kama jiraan, marka arrintani waa mid umada dan u ah, aniguna halka waxan kaga qaylin jiray iyadoo bilaw ah, war saddexdan xisbi ee isku xaafada ah ha la tirtiro oo xisbiyadii waagii hore oo kale sidii kii Ina Rayaale iyo Kulmiyihii hore iyo kii Faysal Cali war rag fursad ha la siiyo, inana meesha aynu ka kacno, dhiig cusub ama dad cusub ah baa loo baahan yahay, xisbiyoyna u dul-qaata waxan dadka iska leh, dimuqraadiyaduna waa mid shacabka ka timaada shacabkana ku noqotee.

Marka kalmad baadila xaq loola jeedo waa khalad, cid looma jeedo ee maslaxadii umada la dhexdhigay, waana mid dan ah oo inaga iyo dhamaan inoo dan ah, marka cidii fikradaas lahayd waan ku taageeraynaa, anigu hore ayaan ugu qaylinayay, madaxweynahana waan ku ayidsanahay.

Arrinta ku saabsan inaga iyo Itoobiya, anigu waxaan ka dhageystay Al-jazeera iyado saddex nin ay shirayaan oo la leeyahay nabadgalyada geeska ayaa laga shaqeynayaa, horta arrinkan la inoola yimi dawlada Itoobiya iyo dadkeenu waa walaaladeen way ina wanaajiyeen saacadii adkeyd abaalna waynu ugu haynaa jaarna waynu nahay jaarnimo wanaagsan baa inaga dhaxaysa. Ninkii dhintay ee Melez wuu inaga yiqiinay oo inagaaba waraaqaha waxtarkiisa haynay, taariikhda uu soo galay iyo taynu soo galnayna isku mid bay ahayd xaga xoreyntii, marka nin taariikhdeena yiqiinay buu ahaa, hadaba, Al-jazeera waxa laga yidhi geeska Afrika la heshiisiinaya, inaga waxa inaga dhiman xafiis macluumaadka iyo saxaafada caalamka wixii ka soo baxa monitoring-gareeya iyo wax

geeska ka socda oo hadhaw Madaxweynuhu marka aduunka meel qabanayo, sirdoonka iyo safaaraduhu waxay report ka soo qoraan wadanka ay joogaan macluumaadkiisa dhaqaale, siyaasadeed, amni iyo arrimo bulshoba wax walba warbixin ka soo qoraan, marka xafiis ururiya oo warbixin ka sameeya macluumaadka iyo saxaafada waxyaabaha geeska afrika ka socda baynu u baahanahay.

Waxaan xasuusanahay M/weyne Cigaal AHN, markuu tagay Nairobi waagii ugu horeysay ee ay Caydiid AHN ay isugu tageen, Arab Moy baa dacwada soo jeediyay oo wuu u tagay, Arab Moy wuxuu ahaysta Cigaal AHN in nin la mid ah Afrika aanu jirin oo waxay isku barteen Caruusha Declaration-kii markii NFD xerada la galiyay isaga iyo joma kenyanta ragii uu u dooday bay ahaayeen, dabadeedn, anigu waan arkay Arab Moy oo waraaq baan u geeyay, wuxuu igu yidhi nin great ah baa idinka dhashay laakiin qiimihiisa garanmeysaan waa waagii Cabdiqaasim Madaxweynaha ahaa ee la ina go'doominayay ee la isugu keen tagay, waxa la doonayay inay israacaan Djabuti, Eretria, Sudan iyo Kenya, halkii buu telephone ku dhuftay intii east afrika ahayd ee shirka imanaysay oo wuxuu ku yidhi hoos baynu u dhigaynaa ee ha tagina shirkii, halkaasay IGAD ku fashilantay.

Dabadeedna ina Cigaal waxa loo diyaariyay ninkii ku mucaradka ahaa ee Kukuuyada ahaa inuu shir jaraa'id la qabto, hada waa ninkii ay isku jabeen ee kukuuyada maalqabeenkooda ahaa, iyadoo halkii loo diyaargareeyay baa waxa noo yimi nin oo nagu yidhi war miyaad waalan tihiin waxa socda maydaan ogaynba war Madaxweynihiinii mu'aamarad baa loo dhigaye ka gaadha, dabadeed sidii baanu ku baajinay, haduu maalintii gali lahaa ilayn ninkii martida u ahaaye baa la doonayay in isagu lagu mu'aamaradeeyo dhibweyn bay noqon lahayd, marka, wixii umada dan u ah yaan la diidine ha la soo dhoweeyo.

Arrinka inaga iyo Farmajona, Farmajo taariikh cusub buu la kulmay, waxana waxba kama garanayo, isagayna u tahay gardaro inuu cid soo magansado, waxayna halkan sharci ahaan u siinay in Madaxweynuhu ka qaybgali karo shirarka oo wada-hadalada uu gali karo, taas macnaheedu waxa weeye inaga iyo somalidu waynu wada hadli karnaa, waanay taagan tahay, nin Madaxweyne ah khaa'in maaha haduu cid la shiro, hadii Cabdiraxman noqdo Madaxweyne wuu la shiri karaa, Muse khaa'in maaha, Axmed khaa'in muu ahayne halkaas ayaynu ka cadeynay inay shirarka iyo wada-hadalada gali karaan, tii baana socota ilaa iminka, sidaa awaadeed, marxalada isaga waxa u wanaagsanayd min Kenya ilaa itoobiya qowmiyad Somali ah baa joogta oo dad walaalo ah baynu nahay oo isku dhaqan iyo isku diin ah, dadkana waxba kama dhexeeyaane arrimaha siyaasiga ah baa laga wada-hadlayaa, kan muqdisho jooga iyo kan Kismayo joogaaba waa walaalkeen, marka yaan la isku khaldin dad walaalo oo ehel ah baynu nahaye, inaguba markii Kenya doonaysay inay bada qaadato waanu ka xumayn oo waanu ka xanaaqsanayn, mana ogolin dhul Somali leedahay bad iyo macdanba in

shisheeyo qaato, dee adna nala mawqif noqo (Farmajo) oo fahan qadiyada, maaha kalmad aad leedahay raali ahaada reer Somaliland, war anugu cid waxba uma haysano adigana waxba kuuma haysano, laakiin siyaasiyan layn baanu jeexanay umadu xaq bay u leedahay dariiq mustaqbalkeeda inay iyadu jeexatee, maaha in inta cid la soo kaxaysto la yidhaahdo kaalay ku khasabne, war qof kaliya ayaan amar la siin karin oo wax lagu khasbi karin iska daa shacab dhan oo dhibaato soo gaadhay walibe. WSC.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal** **(11m, 23sec):-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Kaaliyayaasha iyo Saxaafada waan idin salaamayaa ASC, waxa aan doonayaa inaan ina xasuusiyo waxaynu garanay in laga doodo xaalada wadanku ku sugan yahay, waxa muuqata qof walba halkii bugtay ee uu jaaniska u waayay inuu ka hadlo u jeclaysanayo, dabadeedna mawdiicii inaga lumo, waxaan islahaa wixii dhibaato ee jirta ayaa laga hadli doonaa, wixii soo jeedin ah ee banaan baa laga hadli lahaa, marka waynu ka yara leexanay. Anigu waxyaabihii aan islahaa ka hadal kama hadlayo maanta, sababto ah, fari tog-dheer bay kula xushaa, waxa ay noqonaysa in la tixraaco hadalkuna dheeraado, tixraacuna ma fiicna oo waxay noqonaysa in midba mid ku riixo.

Sida Xildhibaanadii hore tilmaameen nabadgalayadu way wanaagsan tahay wadanku waa barwaaqo Ilaahay ha inoo siyaadiyo, laakiin waxa loo baahan yahay waxyaabo talo ah oo ay haboon tahay in hadii aynu Golihii Wakiilada wixii talooyin inoo muuqda ee ay tahay in loo soo jeediyo Xukuumada in la sheego oo la tilmaamo, shalay Xildhibaan Siciid ee wada matalno Gobolka Saaxil wuxuu ka hadlay arrinta DP World, wuxuu ahaa ragii aanu wada diidnay mashruucaas, markii uu hadlay xildhibaan baa ku yidhi soo adigii diidayay, horta barigii inaanu diidno kumaanu khaldanayn, waxay ahayd in wax dhan naloo keeno, waxaad xasuusan tihiin inaan ku khatimayay hadalka dheer oo aan ku dajinayay DP World oo Af-carabi aha, waxa wadnaha noo galay beesha saaxil ee aan ka soo jeedo ayaa horumar diidan, horumar maanu diidanayne waxaanu diidanayn wax dhan in aan la inoo keenin. Waxaynu ogayn in Wasiir Maxamud Xaashi iyo Wasiir Sacad ay labaduba inoo sheegeen inaan heshiis dhicin, laakiin Wasiirad Samsam ayaa khilaaftay, waxaanu doonaynay waxay ahayd in wax dhamaystiran la keeno.

Maanta waxa dhacday, si kastaba ha noqote in dadkii la yara raaligaliyay, khiyaamadaas waxa sameeyay DP World oo shaqaalihii lacag aan hore loo siin jiray ayay siiyeen, maanta hadaad soo hadal qaado DP World iyaga budhka ku saaraya, laakiin waxa weeye Xukuumadii hore haday dhaaftay oo tani wax hagaajisay in la inoo sheego oo dadkana loo sheego oo loo calool qaboojiyo, taas lama diidana. Midka maanta sii taagan ee meel uu ku dambeeyay aan la aqoon waa arrintii Base-ka, waad xasuusan tihiin oo Madaxweynuhu mar wareysi laga qaaday, wuxuu yidhi waanu kiraynay oo kiraanu ka qaadanaa, Wasiiro kale oo hadlayna sheegeen in aan kiro laga qaadin, wixii meeshaasi ku dambeysay waxa laga rabaa xukuumadu inay sheegto.

Waxa jira markay base noqoto oo aan anigu aad xasaasi uga ahay, waayo dhibaataday leedahay baan ogahay, imika cadan oo inoo dhow waxa ka socda Mehreb meesha la yidhaahdo oo bada carabta ku soo jeeda dhibaatada ka taagan, sucuudigu waa sidaaso kale, marka waxaanu doonaynaa meeshay ku dambeysay in naloo sheego, laba qaanuun baa jira oo marka heshiis la galayo wax lagu kala qorto, mid waa SFA (states of Force Agreement) laba dawladood buu u dhexeeya wixii lagu kala qortay oo kaas waanu doonaynaa wixii lagu kala qortay, kan kale waa MUCJ military uniform cord of justice kaasina wuxuu xukumayaa ciidamada meesha jooga waxay yihiin, ma hayno kaasna, base-ka calanka qolada aad siisay baa laga taagayaa oo waa meel ay leeyihiin lamana ogola in la galo oo Madaxweyne iyo inagaba lama ogola in la galo, marka wixii la kala qortay baan kaasna doonaynaa, hadii aan markii hore waxba la kala qoran, Xukuumada iminka joogta haday dib ugu noqotay ha la isu sheego arrintaasi waa mid aad noogu taagane.

Waxa kale oo aanu doonaynaa, horumar wixii ku saabsan si kasto ay tahay lama diidana, laakiin wixii international agreement ku saabsan waa inay golahan yimaadaan oo uu goluhu ogaaldaa, wixii la keenay may ahayn oo shan bage bay ahayd. Gudoomiye, waxa weeye, hadii dib loogu noqday waa in la keena oo la inoo sheegaa.

Waxaynu maqalnay in badan wadan la wada leeyahay, cid laga saaray oo la yidhi waxba kuma lihid maan maqal, hadii tahay in axsaabta madax laga noqdo dee ninkii baahnaw axsaab baa la furayaa dee soo gala oo ka soo wada qayb-gala, waxay illa tahay, in dib dambe midkaas ugu tiigsan oo aynaan odhan lama wada laha wadanka, axsaabta lama wada laha, dee waa lawada leeyahay wadanka iyo axsaabtane, ninkii xisbi u baahane kuwa la furayo ha ka qaybgalo, WSC.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid** **(23m, 55sec):-** Shirgudoonka, Mudanayaasha Golaha, Marti sharafta iyo saxaafadaba ASC, bacda salaan. Gudoomiye anigu saaka hadalkayga waxaan ku bilaabayaa woxoogay information ah oo uu shalay halkan Xildhibaan Cabdiqaadir Jirde bixiyey oo ku saabsanaa wada hadalo 1946 dhex maray dawladii ingiriiska iyo Ethiopia oo ku saabsanaa is waydaarsi dhul. Arimahaa wasiirkii Arimaha Dibada ee barigaa oo la odhan jiray **Ednes Deny** iyo Wasiirkii Mustacmaraadka oo la odhan jiray john henry hold, labadaa wasiirbaa xukuumadii ingiriiska waxay u qoreen memoremdem qoraal dheer oo ku saabsan soo jeedin ay dawlada ethiopia soo jeedisay oo ah inay doonayso marin badeed oo saylac ku xidhiidhiya oo balaceeduna uu yahay ilaa 100 mile oo ay ku badalato dhul ka mid ah dhulkii soomaalida ethiopia gacanta ugu jiray markaa.

Qoraalkaas oo sagaal page ah waan hayaa imika, isagoo taariikhiyaan hayaa hadii loo baahdana shirgudoonka iyo wakiiladaba waan u gudbin karaa isagoo qoraala, googleka hadaad gashaana waad ka heli kartaan isagoo qoraala waa memeromdam ay labadaa wasiir ee wasiirkii arimaha dibada ee xiligaa iyo wasiirkii mustacmarka ay u qoreen

golaha wasiirada, rayiga markaa ay soo jeediyeena labadaa wasiir way aqbaleen wayna soo dhaweeyeen iyagoo ku sababaynaya in xidhiidhka wanaagsan ee ethiopia iyo ingiriiska ka dhaxeeya la ilaaliyo marin badeedkaa ay itoobiya ka doonaysa area daa saylacna loo ogolaado, lagagana wareejisto lagaga badasho qaybo ka mid ah hawd iyo reserve area oo ka mid ahaa dhulkii markaa 1897 dawlada ingiriisku ay u saxeexday dawlada itoobiya.

Maalmahan waxaa mediaha ku jira qoraal ay soo dhigtay website ka la idhaa **somtribune** oo ah xidhiidhka itoobiya iyo somalia ma dibuu usoo noolaynayaa saylac negiotion kii barigaa ingiriiska iyo itoobiya ay ka wada hadleen, su'aashaas oo qoraal ilaa dhowr page ah analyze ahaana loosoo raaciyay qoraalkaa barigaa ay labada wasiir u gudbiyeen dawlada ingiriiska ayaa maalmahanba website yada iyo media ku jiray, halkaa barigaa hore dhulbaaba lays waydaarsanayee maanta waxaa la tilmaamayaa iyadoon dhul lagu badalanayn ay dawlada itoobiya ay dawlada somalia si dhib yar ugu saxeexi karto, iyadoo dano siyaasadeed iyadana laga fushanayo sidaasaa qoraal u dhigayaa waanad akhrisan kartaan qoraalkaa.

Halkaa runtii waxaa inooga eeg inaynu aad taxadar uga muujino dhaq dhaqaaqyada geeska ka socda marar badana waxaynu aragnaa **38:19** oo kasoo baxa xafiiska raysal wasaaraha laftiisa ama maabab lasoo dhigay wasaarada arimaha dibada ee itoobiya baynu aragnay oo dhul badan oo somalia ka mida lagu darayo itoobiya tii ugu dambaysayna waxay ahayd iyadii oo khariiradii somaliland meesha laga saaray oo badii gulf of aden iyo khariiradii somaliland la isku furay ood moodo meesha wax loola jeedaba laga saaray map caynkaasa oo la leeyahay page twiterka ee raysal wasaaraha itoobiyaa lasoo dhigay.

Arimahaas runtii dareen bay bixinayaan qoraalkaa aan leeyahay somtribune baa qortay waxay leedahay barigaa horena somaliland waxba lagalama tashan oo waxba kamay ogayn maanta dhaq dhaqaaqyada socdana waxba kama oga dadka reer somaliland bay u dhigaysaa, markaa halkaa runtii jaanisyo badana waa inagu jiraanoo hadal haymo badan baa jiroo saldhigyo dawlado kale oo quwado kale ah baa ay danaynayaan ama ingiriis ha ahaadaan ama ruush ha ahaadaane danaynayaana iyana way ku jiraan wararka halkaa markaa inaynu dawlad ahaan taxadar uga muujino oo ka yeelano ayaan aad u baraarujinayaa taas intaasaan kaga baxayaa.

Waxaan u gudbayaa arintan maalinta dhawayd madaxweynuhu ku dhawaaqay ee furista ururada siyaasada mudanayaal badana ay hortay ka hadleen, qoraalka ah khudbadaa madaxweynaha, waxaa furista ururada siyaasadeed saldhig looga dhigay eedayn loo yeelay xisbiyada mucaaradka ah oo la leeyahay labadii sanadood ee u dambeeyey muran ay abuureen xisbiyada mucaaradku baa lagu sababeeyey ururada la furo. Horena halkan waan uga hadlay oon uga sharaxay iyadoo xeerka iyo qodobada xeer aan cuskanayo imikana waan ku calinayaa labadaa sanadood ee aynu soo dhaafnay

xisbiyada mucaaradka ahi ceebta dib u dhaca dooroshooyinka may lahayn, mid-way lahaayeenoo xisbiga wadani siiboo wuxuu soo eedeeyay komishankii doorashada in komishan la eedeeyo oo la idhaa komishankaasi dambigaasuu galayna ceeb maaha wax kitaab ku qoran oo leeyahay way jiraan oo way dhaceena maahee waa eedaynoo wax cusub maaha.

Xeerku halkaa wuxuu tilmaamayaa in marka arimahaasi ay yimaadaan waa Qodobka 14aad marka arimahaas ay yimaadaan ee komishanka dhex dhexaadnimadiisii la duro ee lagu eedeeyo arimo kale oo qodobkaa 14aad farqadiisa 1aad xustay lagu eedeeyo madaxweynaha waxaa ku waajib ah in uu u xil saaro gudi baadhiseed oo arimahaa soo baadha. Bal aan is waydiinee madaxweynuhu eedayntii timide qodobkaa ma fuliyoo bil ama laba bilood dhamaan layde qodobkaa miyaa la fuliyoo eedayntii gudi baadhiseed loo diray, waxaan qabaa inay maya ahayd labadaas sanaba xisbigu wuxuu la taagnaa eedayntaas hala meel mariyo oo gudidaa haloo xil saaro oo ha cadaato oo komishanka wax ku cadaata ha noqoto ama wax lagu waayoo bari yeeloo shaqadiisa uu sii wato ha noqoto.

Halkaa waxaan leeyahay labadaa sanadood waliba xisbiga kulmiye ku eedayn mayo oo gacmaha waxba uguma jirin madaxweynaha oo qudhaa arintaa lahaa oo ahaa masuulkii arintaa ahaa inuu gudi u saaro oo uu magacaabo ahayd baa labadaa sanadood dibu dhaca ku jira lahaa.

Beesha caalamku way ina soo dhex gashay heshiis bay saddexdii xisbi oo uu madaxweynuhu goob joog ka ahaa oo uu gudoomiyihii xisbiga ahaa baa lagu dhex dhexaadiyay saddexda gudoomiye xisbiba ay saxeexeen, heshiiskii waxaa ka mid ahaa in komishanka laba xubnood lagu kordhiyo oo golaha wakiilada loo gudbiyo mooshin, oo hadii la ogolaado qodobkaa marka wax laga badalana komishanka lasoo xulayaa uu noqdo 9 kaa xubnood, hadii goluhu ogolaan waayana lala sugo golaha dambe. Arintii caynkaas ahayd halkay ku dhimatay wayno ogaynoo golena soomay gaadhin heshiiskii beesha caalamku inagu dhex dhexaadisayna halkaasuu ku buray. Xisbiyada mucaaradku taana way liqeen taa horee loo jid bixin waayayna way liqeen, waar manta uun todobadii aan soo xulno baa lays idhi, todobadii lasoo xulayna shuruudihii loo raaci lahaana gudoomiye waxaynu ognahay inaan la wada ilaalin oo masuul aniga ila mid ah oo xisbi yahan ahina uu ka mid noqday komishankii madaxweynuhu soo magacaabay, process ka sidii lagu mariyayna waynu ogayn, waana waxaa ila imika ina hortaagan weeye in heshiiskaa jabay iyo shuruudihii xeerka oo la jabiyay intuba iyadana cidbaa leh labada xisbi mucaarad way qaadaceen oo ay ku qaadaceen xubnahaa aan dhex dhexaadka ahayn ee ku jira. Laga soo gudubyoo gudi dhex dhexaadinbaa dhex gashay, gudidii dhex dhexaadintu go’aamadii ay soo saareen ee saddexda xisbiba aqbaleen ilaa imika waxaa laga sugayaa madaxweynaha fulintiisii.

Marka heshiiskii beesha caalamka la diiday marka heshiiskii gudidii dhex dhaxaadinta la fulin waayay xagay ka fuli wayday waa xagee, xildhibaanbaa wuxuu ku daray xisbiga wadani oo laba sano diidanaa komishankii hore ayaa manta soo dhaweeyoo qaatay.

Xisbiga wadani caashaquu iska caashaqay komishankii hore marlabaad hala keeno muu ku codsan oo codsigiisa kumay iman ee dushaa lagaga keenay isagoo qadhaadhna wuu qaatay. Is waydiintu waxay tahay halka xisbigii uu intaa qadhaadhka ku ahaa ee uu labada sano diidanaa la marsiiyay ee kalsoonidii gudida dhex dhaxaadinta ah uu siiyay uu ku qaatay maxaa kii uu siti muldhukhda u ahaa ee shahaado sharafta siinayay muxuu manta ku diidan yahay bay is waydiintu tahay. Wuu jeclaan lahaa in halkaa xisbiga wadani uu diido oo uu idhaa wadani baa diidan, manta cida diidan maxaa farta loogu fiiqi laayay ee loo odhan waayay waa madaxweynaha. Safiiraa halkan inoogu imid kii ingiriiskaa ugu horeeyey bishii January dhamaadkeedii waxaana loo balan qaaday in laba wiig gudohood.

Waxaan kusoo ururinayaa furista ururadu wakhti bay leedahay 10 sano ayuu xeerku bixiyay wali xeer kale oo kaa badalay oo jideeyey ama aynu ka hadalnayna ma hayno oo aynu manta nidhaa waa mudadaas golihiina ma horyaalo, hadii xildhibaanada qaar wax kasoo draft gareeyeen xeerka la sheegayo oo ay iyagu professions ku qoran tilmaamayaan waxaan halkaa ka odhanayaa qodobadaa xeerka marka uu applicable noqdo ee la dhaqan galiyo taariikhdaa dhaqan galka iyo wixii ka dambeeya ayuu xeerkaas dhaqan galaa. Ruqsad xeer hore bixiyayna iyo xaq uu bixiyayna xeerka cusubi ma laali karo ruqsadaa ruqsadaha dambe uunbuu gaabin karaa ama dheerayn karaa kolba sida xeerku yahay. Waxaa taas ka mida oo tusaale u noqonaysa halkan waxaynu ku ansixinay xeerkii ismaamulka gobolada iyo degmooyinka waxaynu yaraynay tiradoo golayaasha deegaanka magaaladan hargeisa 25 baa u qornaa xeerkaana waxaynu ku ansixinay inaynu 17, golihii deegaankee manta joogay ee 25 ahaa muu 17 ka dhigay waa maya golayaasha dambe ee la dooranayo uunbuu xukumayaa, sidaasoo kale ayuunbaa xeerka aynu manta ansixinaana ayuunbuu wakhtiga iyo ruqsadaha dambe wakhti ugu qaban karaa non contra activity of low ayaa la idhaahdaa mabda sharci weeye oo international ah oo ah inaan lagu dabiqi Karin dhacdooyin hore u dhacay marka uu xaq bixinayo sida criminal law ga marka uu ciqaab ka badan ciqaabihii hore bixinayo ayaa kiisaska ku jira ee aan pinal ku qorin ayaa la idhaa keebaa **viberable** u ah ma xeerkan dambaa ciqaab sahlan bixiyey mise kii horaa ciqaabtiisu sahlanayd markaa eedaysanaha waxaa kolba loo raacaa kay ciqaabtiisu sahlan tahay waa marka uu xaqa bixinayo.

Daraad waxaynu halkan ka ansixinay xeerka nidaamka garsoorka, xeerkaas mudo malaa 10 sano ku dhowdhow. Xeerkaas wuxuu bixinayay madax banaanida garsoorka qodobo badan oo madaxbanaanida garsoorka wax u dhimayay buu xeerkaasi kaabay waxaa ka mid ahaa, qaabnaynu markaa u ansixinay qaabaa loo sameeyey ah marka xil ka qaadis laga samaynayo gudoomiyaha maxkamada sare process loo maraa baynu samaynay oo

guddidu inay talo kasoo bixiso qaabkaasaynu samaynay. Garsoorayaasha maxkamada sare oo aan wax protection ah lahayn protection buu u samaynayay xeerkaas 10 sano laga soo shaqaynaayay, protection kii aynu samaynay shalay baynu qaadnay. Waxaa halkan lagu soo qaaday.

Heshiiskii dekada siday manta u shaqayso inay qurux badan tahay iyo inkale qurux badnindeeda iyo maalgalinta lagu sameeyo arimeheedaasi cid diiday ma jirin laakiin waxaynu isku haynay uun nidaam sharci haloo raaco sidaa uu xildhibaan xaamud sheegay, heshiiskii dekada lagu galay ilaa imika terms warqad lagu tilmaamay oo ciwaan looga dhigay **terms technical conception** iyo terms sheet in respect of shareholders agreement, iyagay ku qoran tahay inaan loo qaadan Karin heshiis, dastuurkeena qodobka 11aad wuxuu waajibinayaa in maalgashi shisheeye la sameeyo waxaanu leeyahay xeer baa qeexaya qaabka loo samaynayo. Xeerkaas uu dastuurku qeexayo waa la sameeyay waana xeer 29 2004, wuu samaysan yahay wuuna yaalaa dekada iyo maalgalinteeda marki la wadayna lama adeegsan xeerkaas, board buuna xeerkaas tilmaamayaa qodobkiisa 5aad la idhaa national investment board oo ka kooban 8 agaasime guud iyo gudoomiyaha rugta ganacsiga.

**Qodobka 11aad** wuxuu leeyahay the **foreign investments should be registered** wax alaala waxa heshiis maal galineed waxaa u xilsaaran board kaa. Waxaa kale oo qodobka ugu muhiimsan uu leeyahay marka meel la maal galinayo baanka dhaxaa hadii kaash lagu maal galinayo iyo hadii **in count** lagu maal galinayaba waxaa register garaynaya baanka dhexe mechanism lagu maal galinayana baanka dhaxaa la soconaya xeerkan looma raacin, waxaan leeyahay ha la keeno hadii mechanism kaloo inoo ilaalinaya lacagta maalin walba soo baxda ee imaaraadka loo xawilo. Ma teenaa lagu maal galinayaa mise $4,340,000 oo imaaraadka ka timaadaa lagu maal galinayaa inaynu kala ogaano weeye, marka makaanisam kan xeerku dhigay badalay ee arrinta inoo ilaalinaya waxaan odhan lahaa hadii Gudi dhaqaale ka warhayso iyo hadii xukuumada loo yeedhoba xaq buu Golahani u leeyahay inuu xogta helo wax dekadeenii ka soo baxa mise lacag aynu qaadano oo hadhaw la inagu jaro baa la inagu maalgalinayaa, marka arrintaa jawaabteeda ha la doono oo ha la helo.

Waxaan leeyahay oo isku baraarujiinaynaa, inagu Wakiilo nahay, muranka dhexyaala dadweynaha dhexdiisa ee marfish walba laga hadlayo waxaan isleeyahay hadaynu xilkeenu gudano oo umadu waxay doonayso wax kasto la fulinayo aynu dabagalnayno muranku wuu inaga hadhi lahaa. WSC.

**Md. Prof. Maxamed Cumar Aadan (jiir)** **(25m, 11sec)**:- ASC, waxaan yar doorbiday inaan kala qaadqaado oo kolba mawduuc wax ka idhaahdo, kumana dheeraanayo oo hadalka xoog uma aqaano.

Hadaan ka bilaabo, Siyaasada Arrimaha Dibadda, wada hadalka inaga iyo Somaliya, waxaan isu qiyaasa markii aynaan xidhiidh la yeelan qoladaas ee ayaan odhan waynu hadlaynaa iyo intii dambe xaaladeenu siday ahayd, marka hore taladeena waxa saldhig u ahaa anagu waxayagii waanu la noqonay waxna ka waydiin mayno qoladaas, sheekooyin kale oo farabadan baa inagu soo biiray oo ay ka mid tahay inay daruuri tahay hadaad doonaysaan inaad go'daan inaad qoladii aad ka go'deen la hadashaan, markii horena wax sidaasa oo aynu isku darsanay ma jirin, waxa la ina tixgaliyayna ma jirin, waxayagii waanu la noqonay baynu nidhi sidaasaynu u shaqaynaynay oo caalamkana kula xidhiidhaynay.

Intii dambe, wax inoo yimaadaa ma jiraan wixiiba waxay ku wareegeen xagooda, marka anigu waxaan odhan lahaa khasaare badan baynu ka qaadnay, waxa ka mid ah Madaxweynaha xaga jooga hada ee Farmajo waxa muuqata wixii qolooyinkii ka horeeyay ee aynu wada-hadalka la bilawnay masuuliyaadkii ay qaadeen ee magaca umada ku qaadeen inuu isagu ka leexday oo wixii ay magaca umada madaxweynayaashii ka horeeyay ku qaadeen iyo heshiisyadii aynu wada galnay wixiiba way baabe'een, marka ma garanayo si aynu dood dambe ula wadi karno mar hadii reliability meesha ka baxay oo wixii la balan qaado aanay ahaanay wax taagnaanaya, marka way ila adagtay sida wax loo wadayaa hadaynu taas aragnay, marka xukuumadu inkasto xaq u leeyihiin siday yeelayaan laakiin aniga iilama muuqato wax sii soconaya.

Waxaad aad u ayidayaa fikrad aan ka soo gaadhay Xildhibaan Raygal taas oo ah inaynu wadama Commen wealth-ka la yidhaahdo ee ah wadamadii ingriisku gacanta ku hayay, inagaana isaga tagnay barigii, iminkana hadaynu cabaar dabagalno oo riixno waxa dhici karta inaynu is afgarano, qoladii barigii dhowayd waxay ka keentay in la yidhi arji soo qorta, aniga iyo Bashiir bari aanu tagnay waxaanu ka keenay niman yidhi na casuuma oo aad u xiisaynayay oo muhiim ahaa aanu ka mid ahaa ninka Commen wealth secretariat -ka Baarlamaanka ugu jira ee Baarlamaanka oo isagu had iyo jeer sida wax u socdaan Gudidda ka dhisan London ilaaliya, gudida kii xoghayaha u ahaana wuu ku jiray, nin kale oo kuliydu magacawdo oo audit general ahaana wuu ku jiray, nimanka hadalo ayaanu isku tuur-tuurnay aad bayna u xiisaynayeen, kaas kuliyadu magacawdo wuxuu igu yidhi Somaliland baan joogi jiray oo aabahay baa ciidamada ahaa aad baana u jeclaan lahaa buu yidhi inaan idiin imaado, inaan halkan keeno xooga maaliyad daro ah ayaa jirtay, iminka waa mid aad u muhiima oo waa inaynu gacanta qabsanaa oo shirarkooda tagnaa oo waxyaabahaas dabagalnaa.

Hadii aynu doonayno xidhiidh wanaagsan inaynu samaysano, waxyaabo badan oo iminka dunida ka socda oo magaca lagu dhisaa baa jira, waxa ka mida waxaad arkaysaa wadamo aanu xidhiidhkoodu wanaagsanayn marka hore oo xaga ciyaaraha ka soo bilaaba oo team intuu tago xidhiidh la yeeshaan si dadkii isku afgartaan oo gartaan wadankani wuxuu yahay oo message-kan inta waysidaan qolada caynkaas inaga oo

waxbay ka dhaadhicin karaan, marka kooxo ciyaaraha iyo team politician ah oo wadamada iska wareega oo cid walba ka socda sida Xukuumada iyo Baarlamaanka oo dalalka xidhiidh informal ah lala yeesho, marka waxyaabo caynkaas ah ha la sameeyo oo dawladu ku dhaqaaqdo intay miisaaniyada sanadkeeda ku darsato in xoogaa teamam noocaas caalamka loo diro, hadaa saxaafadeenu waa caynkaas hadii mararka qaar loo diro.

Barigii aanu anagu tagnay meeshaas London, waxaan arkay jasiirado farabadan oo aan afrikaba xidhiidh la lahayn, gabigooduba aan xidhiidh ka jirin, waana jasiirado ay qaarkood jasiirado kale hareeraha ka xigaan barwaaqo qudaarta beerta ah lagana yaabo inay u baahan yihiin meelo ay ku iibiyaan oo afrikaba suuq u noqon lahayd, kuwaas oo kale oo aanay cidba is aqoonin hadaynu u tagno waliba shirarka Common wealth-ka way ka qayb-galaan oo waa meelo ka wada tirsan common wealth-ka, marka waa inaynu xidhiidh la yeelano ama ganacsiba la yeelano, waayo waxa laga yaabaa inay marka dambe qudhoodu pressure saari lahaayeen dawlada Ingriiska oo waxa dhici kari laha hadii aynu ka muuqano common wealth-ka in marka dambe culays la saari lahaa, marka waxaan soo jeedinlahaa meelahaas aynu ka muuqano ku dhiirano xidhiidh inaynu la yeelano oo u tagno.

Inta markan arrimaha dibada ku dhaafo, waxaan u gudbayaa arrimaha daakhiliga, daakhiliga sidii afrika wadamo badan ku dhacday baa inaga dhacaysa inagana oo markii horena muqdisho inagaga dhacday, waxa arrliga intiisa kale inuu cidlo noqdo oo caasimada oo kaliya la isugu yimaado, barigii wadama common wealth oo koonfur afrika ku shirayay baan ogaa maayaradu ka qaybgaleen oo kii muqdisho tagay, dhibaatooyin isku mid ah ayay ka wada hadleen, dhibaatooyinkaasi waxay ahaayeen dadkii oo ku soo batay, maciishadii oo qaali noqotay, biyihii oo yaraaday iyo guryihii oo la kala waayay, intaasiba iminka way ina haysataa, 7 sano baan xaafad ku jiraa, 7 sanoba biyihii way soo socdaan waan maqlayay, bilaha qaar baa 140 kun la iga qaada, dawlada eed ma saarayo priorities bay leedahay waxa soo galena waynu ognahay oo naftii baa iyaba haysa, inta meelood ee la inaga soo hujuumayo waynu ognahay, maciishadii dadka waynu ognahay, waxyaabo badan baa jira, laakiin prioritieska ayaynu isku haysanaa oo mararka qaarkood waxaasa priorities ah iyo waxasa ah, taasina marka la eego relatively qofka hogaanka hadba haya siday ula muuqato ayuu u dhigayaa oo ma odhan karno boqolkiiba boqol wuu khaldan yahay, ama cidaasi way khaldan tahay.

Marka caasimadii maanta waynu aragnaa oo cidhiidhi baa ka jira, bariiskii iyo baastadii way kacday, wax la cuno lama hayo, dadkii waxba wax u goyn maayo, dollarkii wuu kacay, dollarkuna fold dadko dhami wada leeyahay weeye runtii, dollarkiina siduu u socdo halkaasuu qabtaa, maxaad wax ku soo iibsan, lacagteenu ma dhaafo inta gudaha dalka, waliba lacag faro badan oo ajaaniba baa ina soo gala oo aynu isticmaalnaa, waxa weeye lacagtii waynu wax ku soo iibsan lahayn baa halka ka wada baxay, waxa soo

hadhay 10%, marka intaasna ma dhakhtar baa alaab loo siiyaa, ma ciidamada mushahar loo siiyaa, xagee la geeyaa, gidigeena waynu wada guntan nahay oo ma so dhacay baynu leenahay, waa sun bahalkani suntaasa ina baabi'isay lama xukumi karo oo arliga oo dhan baa banaan meeshuu doono ka soo galayaa, ingriiskii baa joojin kari waayay, afweyna yidhi garoomada diyaaradaha waan la baadhayaa oo mishiin baa la marinayaa isna wuu ka soo degayay.

Marka waxaan soo jeedinayaa, magaalooyinka kale ha la isku dayo in la dhiso, aynu isku dayno goboladii kale umada ahaan aynu dhisno oo wadanku yaanu caasimadu noqon, waliba intaynu gudiyaal dirno ka samaysan inaga iyo xukuumadaba inaynu sanadkii ugu yaraan marno oo goboladan laga soo yaacayo ee laga cabanayo ee leh waxba naga maqan ha soo qoreen warbixin oo ilaa madaxweynaha ha la socodsiiyo oo ka dib wixii la qaban karo ha la qabto, marka in laba gudi oo xukuumada iyo inaga ha la sameeyo.

NGOyada inoo yimaada iyo caalamka wadam waaweyn oo dhami, had iyo jeer waxay is tusaan oo ogyihiin dunida saddexaad kii wax yaqaanay iyo kii wax haystayba inay isugu yimaadaan caasimadaha, kolkaa iyaguna tooda ayay wataan iyagoo istusaya dadka caasimadaha jooga inay wax qabtaan oo dad aynu walaalo nahay oo saaxiibo nahay iyagoo ka dhaadhicinaya caasimada ma dhaafaan, waliba sidaynu ognahay 60-70% waxay keenaan iyagay dib ugu noqdaan, inaga waxay inagu beeraan dependence wax la yidhaahdo oo had iyo jeer aynu ku xidhnaano iyo waxay keenaan iibsato, kuwii hore way ka ilbaxsanaayeeno iminka kuwan cusub inaad adigu wax qabsato ama wax samaysato waligood aan ogolayn, dadkuna wuu iska arbushan yahay oo inay sameeyaan iskuma dayaan, tijaarteena hadaad eegto had iyo jeer inay wax soo dejiyaan oo dibada ka keenaan mooye isma odhanayaan halkan wax ka dhisaan ama wax ka soo saaraan, waxaynu odhan karnaa lacag hawl yar bay dibada ka heleen oo taasay raacku ordayaan.

Marka sidaan anigu u arko si taas looga baxo waxa loo baahan yahay in laba hay'addood ama laba wasaaraadood oo dawladdu leedahay ayaa loo baahan yahay inay shaqooyinkan qabtaan oo yar kordhiyaan, kuwaas oo kala ah Wasaarada Ganacsiga iyo Wasaarada Warshadaha labaduba inay qiimaha caalamka badeecadaha laga soo iibsado oo raashinku ka mid yahay ay eegaan oo baadhaan oo qolooyinka alaabta soo iibsada iyo dhulka alaabtoodu jaban tahay ay isku xidhaan oo halka wixii laga soo dejinayo la keenaa, qoladan warshadahana gidigood biyo ayaynu iskaga wada daba tagnay, kharashna wuu ka baxay, waxaynu dad aanu caqligoodu aad aanu u furfurnayn oo mid baa wax keenayo dadkii kale oo dhami way ka daba samaynayaan, marka warshado kale ayaa la samayn lahaa oo laga faa'iidi lahaa.

NGOyadana waa in dawladu samaysaa hab mid walba halka looga baahan ay tidhaahdo tag oo mid kasta halka looga baahan yahay uu tagaa, marka NGOyada iyo waxyaabaha kuwa kale balan qaadaan waa in distribution lagu sameeyaa oo la yidhaahdo tag halkaa oo ku sameeyaa, taasina waxay keenaysaa in culayskii Hargeysa yaalay ka yaraado.

Waxbarashada, waxbarashada waxaan odhan lahaa private center-ka xagiisa dawladdu ha dhiirigaliso si kastaba ha noqotee, laakiin waa in macluumaadka iyo waxyaabaha muhiimka ah waa inay ka caawisa sida tababarada macalimiinta iyo dhiirigalinta farsamda gacanta oo markiiba qofka barta shaqo galayo oo wax soo saarayo, waxan education-ka la yidhaahdo badankiisu waa wax mudo dheer qaadanaya qofka wax fahma way adagtahay inuu fahmo shaqada wax ka socda ilaa tababar lagu siiyo shaqada, kolka waxaan odhan lahaa wixii ka maqan ha dhiirigaliso wixii kale yaanay waxba ku darsan waayo private center in lagu dhiirigaliyo mooyaane, mid waliba boqolaal qoys buu lacag siiyaa oo looga shaqeeyaa, marka faraglinta dawladdu way ku adkaanaysa oo iyadoo shaqo la'aani jirto intii shaqaynaysay faraglinteedu way ku adkaanaysaa, marka private sector-ka waxbarashada dawladdu gacantay u gaysanayso ha yaraato, iminka industries oo kale waan la direct-gareyn sidaan filayo.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf (6m, 36sec):-** ASC, aad baan u jeclaystay khudbadaas prof. Maxamed Cumar Jiir uu akhriyay, waa cilmi dhan, inaynu samirna weeye oo ninkii wax-garanaya sidiisa loo note-gareeya, dhowr arrimood oo yar yar baan ka hadlayaa anigu.

Mid waa, Ictiraafka Somaliland iyo Somaliya wada-hadalkeeda, somaliya dee waa kii ugu horeeyay madaxweyne ee yidhaahda waan tagaa sidaan Puntland iyo Jubland visit ugu tago oo kale baan u tagayaa ayay ka joogta, waa dambe wayn oo la mid ah inuu hawdii oo dhan la wareegay oo arrinkii joojiyay oo uu doonayo inaynu Muqdisho inagoo gaajoonay inaynu u tagno wada-hadaladu ha socdaan laakiin waxay hayaan aynu eegno, mar hadii farmaajo Itoobiya la shirayo wax kalaaba ii muuqda aniga oo ah Somaliland nagu soo celi anaanu bad ku siino waa adiga ciidanka wayn ee marine-ka ah dhistaye, waxaan ka baqanayaa waxay boqol sanno doonayeen ee dakad ah inay ka helaan Somaliland waliba Zaylac ilaa xayle salaasa, ma aqaano wax u hooseeya Farmaajo iyo Abbey, halka waxay ila tahay inaynu iska ilaalino,

Shan meelood bay isu qaybiyeen Puntland, Jubaland si ay u canjilaan Somaliland, isna waa kan hada leh aan booqdo Somaliland amigo Madaxweyne Somaliya ah oo halkaasay ka joogta, naxariisini ma jirto oo cadaawad xun oo tii laga dagalamay oo kale ah baa meeshaas joogta.

Waxa aduunka ka socda, Corono-virus, inagu waynu qayilaynaa, xukuumadeenu way qayilaysaa dadkii oo dhanba wuu iska fadhiyaa dawladii wax wacyigalin ah may samayn, masaajidadii waxba lagama akhriyin, garanmayno waynu iska fadhinaa, aduunka virus-kaasi si wayn buu u galay, marka waxaan leeyahay Xukuumadu waa inay tabliiq u samaysaa waxyaabahan oo waxan madaarada ka soo degaya la baadho sida aduunka kale hadaynaan wax kale qabanayn, inay baadhaana war uma hayo, xaga masaajidada iyo wadaadana inay ducadii Nabigu NNHK akhriyay ee ahayd ilaahay

waxan naga qabo oo ha nagu soo dayn hadaynaan wax kale odhanayn intaaba nidhaahno oo khudbada jimcaha ha lagu xuso.

Xaga dhaqaalaha, Somaliland waa dad 4 milyan ah in dhaqaaleheeda iyo gudaheeda iska ictiraafta baa wax walba uga wanaagsan, Allxamdulilaah niman aad u mutacalimiin ah oo aqoon leh baa governors kii baanka laga dhigay, hadii baananka iyo systemkoodu inoo hirgalo waxaynu noqonaynaa dad wada-shaqeeya oo wax soo saara oo la maalgalinayo, waxba la soo saarayaa, waxbaynu heli karnaa, foreign currency-gu dibaday inoo ooli karaan, waxa dhacaysa, iminka ninka kun neef diraa wuu ka daba tagaa oo intuu lacagtii soo qaato isago shandad ku sita, aduunka wixii aad dhoofiso dibaday u yaalaan isagoo dollar ama gini ah, isagu halkan jooga buu shillingkii somaliga qaata, tan meesha ka baxday waataas, nimanka governs-ka oo aqoonyahan wanaagsan ah waanu eegnay, waa niman wax badali kara, banking system-ku aad iyo aad buu inooga liitaa, hadii dhaqaaleheena aynu hirgalino ictiraafkan la sheegayaa guduhuu yaalaa dibadaba ma yaalo, marka inagoo wax soo saarna wax badan baa inoo hagaagaya oo halkaas oo kaliyaynu wax ku qaban karaynaa, siyaasad iyo wax kasta waxa inoo haya dhaqaale, marka dawladu xooga ha saarto inay wax soo saaraan.

Waxaan maqlayay, doorashooyinkii baa xal laga gaadhay, aad iyo aad baan u soo dhowaynaynaa, Madaxweynuhu wuxuu is yidhaahdo sulxi baa lagu dhamaynayaa waa wax wanaagsan oo quraankaba sheegay, intaas oo shey baa sulxi lagu dhameeya, yaan lala yaabin, waan soo dhowaynaya, wixii u baahan in lala eegno marka sulxiga la inoo keeno waynu arkaynaa oo waynu sixi karnaa. WSC.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ________________________________________ | ___________________________________ |